

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



Warbixin-Sannadeedka Waxqabadka KMW

2020



 Komishanka Maamul-Wanaaga

 www.ggc.govsomaliland.org



Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland; Muuse Biixi Cabdi



Guddida Maamul-wanaaga Jamhuuriyadda Somaliland

Warbixinta Waxqabadka Komishanka Maamul-Wanaaga

© Komishanka Maamul-wanaaga, 2020

Hargeisa, Somaliland

Tusmada Warbixinta

Komishanka Maamul-wanaaga.....	i
Awoodaha iyo Shaqada Komishanka	i
Hogaanka iyo Qaab-dhismeedka Komishanka	ii
Himilada (Vision).....	ii
Hiigsiga (Mission).....	ii
Hab-dhaqanka (Core Values)	ii
Mahadnaq	iv
Habraaca Diyaarinta Warbixin-Sannadeedka 2020 Ee KMW	iv
Guudmar (Abstract).....	v
CUTUBKA KOOBAAD: Diyaarinta Qorshaha Fog Ee Komishanka iyo Dejinta Qorshaha 2020	1
1.1. Qorshaha-Fog Ee KMW 2021-2023 (Strategic Plan).....	1
1.2. Dejinta Qorshaha KMW (2020).....	3
CUTUBKA LABAAD: Hageyaasha, Habraacyadda, Siyaasadaha iyo Cilmi-baadhisaha.....	5
2.1. Hagaha Baadhista iyo Qiimaynta Hay'addaha Dawladda.....	5
2.2. Diyaarinta Siyaasada Maamul-wanaaga.....	7
2.3. Habraaca Xilwareejinta Qaranka.....	8
2.4. Cilmi-Baadhista Maamul-wanaaga Ee Hay'addaha Dawladda.....	10
CUTUBKA SADEXAAD: Kormeeradda, Dabagalka iyo Baadhisaha.....	13
3.1. Doorarka Komishanka Ee Falan-qaynta Miisaaniyadda 2020	13
3.2. Hubinta Qorsheyaasha Wasaaradaha & Hay'addaha Dawladda	14
3.3. Baadhista iyo Dabagalka Xarumaha Dakhliga	16
3.4. Baadhista, Dabagalka Hay'addaha Dawladda Ee Qaadda Lacagaha Sharci-darada.....	18
3.5. Dabagalka Mashaariicaha Laga Fuliyeey Gabiley, Wajaale iyo Borama	19

3.6. Kormeerada Hay’addaha Dawladda	21
3.6.1. Kormeerka iyo Qiimeynta Dawladdaha Hoose Ee Dalka	21
CUTUBKA AFRAAD: Dib-uhabaynta iyo Maamul-toosinta Hay’addaha	
Dawladda	28
4.1. Habraaca-Maamul-toosinta Maamulka Gobolada iyo Dawladdaha Hoose....	28
4.2. Hagaha-Habraaca Maamul-wanaaga Ee Gudoomiyeyaasha Gobolada	29
4.3. Qiimeynta Hanaanka Maamulka Ee Taliska Dab-damiska Qaranka	30
CUTUBKA SHANAAD: Cabashooyinka iyo Hawlaha Wacyigalinta	31
5.1. Xoojinta Xafiiska Cabashooyinka	31
5.2. Hawlaha Wacyigalinta	33
5.2.1. Doorarka Saxaafada iyo Maamul-wanaaga.....	33
5.2.3. Kulanka Wacyigalinta Ee Isuduweyaasha G. Maroodi Jeex.....	37
5.2.4. Gaadhsiinta Fariimaha Wacyigalinta Ee Bulshada.....	38
5.2.5. Riwaayadda Ilaalinta Saacadaha Shaqada.....	42
5.2.6. Xoojinta Barta Komishanka iyo Mareegta	42
CUTUBKA LIXAAD: Horumarka Qaybta Maamul-wanaaga Ee Qorshaha	
Qaranka NDP 2 iyo Tayeynta Shaqaalaha KMW.....	43
6.1. Qaybta Maamul-wanaaga Ee Qorshaha Horumarinta Qaranka.....	43
6.2. Waajibaadka Qaybta (Sector) KMW	44
6.3. Qayb-hoosaadyada Maamul-wanaaga	45
6.4. Kulamada Qeybta Maamul-wanaaga (Governance Sector).....	46
6.5. Shaxda Kulamadii Qabsoomay.....	46
6.6. Habraaca Abaabulida Hawlaha Qeybta Maamul-wanaaga.....	46
6.7. Horumarinta iyo Tayeynta Shaqaalaha KMW	47
6.8. Gunaanadka Warbixinta.....	48
Sawiro Guud	48

Komishanka Maamul-wanaaga

Komishanka Maamul Wanaagu waa Komishan qaran oo xukuumadeed oo lagu aasaasay Wareegto Madaxweyne oo sumadeedu tahay No: 0048/08/2010, kuna taariikhaysan, 26/8/2010. Waxaana Goleyaasha sharci dejintu ku ansixiyeen Xeerka Maamul wanaagga Xeer No: 58/2012 sannadkii 2012, iyadoo xeer madaxweyne lagu dhaqan galiyey 03/02/2013. Sidaa darteed, Komishanka Maamul-wanaagu waa guddi madaxbanaan oo ismaamusha, loona dhisay inay si buuxda masuul uga ahaato, abuurida iyo daryeelka dhaqan maamul wanaagsan iyo nidaam dawladeed oo ka nadiif ah dhamaan noocyada Maamul-xummadda iyo musuqmaasuqa.

Aragtida Komishanku, waa xaqiijinta in la helo hay'addo xor ah, awood leh oo aan wax la dhuuman oo ay dadwaynuhu la xisaabtami karaan, si waxqabadkoodu u noqodo mid nidaamsan, kana hufan maamul-xumo, isla markaana ku dhisan sharci iyo siyaasado cad oo quman kuwaas oo muwaadiniinta Somaliland fahmi karaan.

Awoodaha iyo Shaqada Komishanka

Komishanka Maamul-wanaagu waxa uu masuul ka yahay tayeynta iyo toosinta maamulka Hay'addaha dawladda si loo helo Maamul toosan iyo hay'addo dawladeed oo hirgaliya mabaadiida maamul-wanaaga, Lana dagaalama maamul-xumadda, wax-isdaba-marinta iyo musuqmaasuqa. Haddaba Shaqada iyo Waajibaadka, KMW, waxaa ka mid ah kuwan hoos ku xusan:-

- ∇ Wuu u madax bannaan yahay xil-gudashadiisa, waxaana reeban talaabo kasta oo lagaga leexinayo xil-gudashadiisa.
- ∇ Dersidda iyo qiimeynta nidaamka maamul ee Hay'addaha Dawladda iyo ka soo talo bixinta habka lagu toosinayo.
- ∇ Ku wacyi-gelinta nidaamka toosan Hay'addaha Dawladda.
- ∇ Kormeeridda hab-sami-u-socodka maamulka.
- ∇ Baadhista iyo dabagalka galdaloolooyinka maamul.
- ∇ Hubinta hirgelinta qorshe hawleedyadda Hay'addaha Dawladda.
- ∇ Soo jeedinta barnaamijyada lagu horumarinayo maamul-wanaagga.
- ∇ Baadhista ku takrifalka awoodda maamul.
- ∇ Hubinta iyo dabagalka ku dhaqanka saacadaha shaqada, isagoo la kaashanaya Hay'addaha ay khusayso.
- ∇ U gudbinta Hay'addaha sharciga wixii faldambiyeedda ee ka soo baxa baadhista.

Hogaanka iyo Qaab-dhismeedka Komishanka

Komishanka Maamul-wanaagu waa guddi ka kooban 5 xubnood, qaab-dhismeedkeeduna yahay Gudoomiye, Gudoomiye-kuxigeen, Agaasime Guud iyo 7 waaxood oo kala ah;

1. Waaxda Maamulka iyo Maaliyadda
2. Waaxda Qorshaynta
3. Waaxda Maamul-wanaaga
4. Waaxda Ladagaalanka Musuqa
5. Waaxda Wacyigalinta,
6. Waaxda Cududa Shaqaalaha
7. Iyo Waaxda ICTiga

Himilada (Vision)

Komishanka Maamul-wanaaga Qaranka waxay himiladiisu tahay Somaliland oo noqota dal uu ka hirgalo nidaam dawladeed oo dhawra sharciga iyo kala dambeynta lagu gaadhayo banyaalnimo iyo isla xisaabtan, dadkeeduna ku nool-yihiin sinnaan iyo caddaalad.

Hiigsiga (Mission)

Komishanka wuxuu hagayaa hirgalinta mabaadiida Maamul-wanaaga iyo helitaanka hay'addo dawladeed oo si habsami ah u guta waajibaadkooda shaqo, oo leh daah-furnaan iyo banyaalnimo, xilna iska saara horumarinta nidaamka maamul-wanaaga xukuumad ahaan iyo Bulsho ahaanba.

Hab-dhaqanka (Core Values)

1. Hufnaan iyo Isla-xisaabta
2. Madaxbanaani
3. Xirfad-yahanimo
4. Cadaalad iyo Sinnaan
5. Dhawrsoonaan

Weedha Gudoomiyaha KMW

Waxaan ku faraxsanahay in aan halkan ku soo gubiyo warbixin-sanadkeed Komishanka Maamul-wanaaga Ee 2020. Komishanka waxa sannadkan u qabsoomay hawlo badan oo muhiim u ah Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland sida; diyaarinta siyaasado, hageyaal, Cilmi-baadhis, baadhitaano, dabagalo iyo Kormeero lagu toosinayey Maamul-hay'daha dalka. Xukuumaddeena uu gadh-wadeenka ka yahay Madaxweyne, Muuse Biixi Cabdi waxa, ka go'an in horumar balaandhan laga sameeyo arimaha Isla-xisaabtanka iyo Banyaalnimada (Accountability and Transparency) oo ah tiirarka maamul-wanaaga aan hiigsanayno in aan gaadho.



Haddaba, Maadama oo Ladagaalanka Musuqmaasuqa iyo hirgalinta maamul-wanaagu ay yihiin masuuliyado saaran Bulshada, xukuumadda iyo Hay'addaha aan dawliga ahaynba, waxa laga doonayaa inay door muhiim ah ka ciyaaraan toosinta maamulka iyo Ladagaalanka Musuqmaasuqa si mustaqabalka dalkeenu u noqo mid hiigsada horumar balaadhan, isla markaana ku taagan dhidibo adag oo ka turjumaya, Maamul-wanaagga, Horumarinta Dhaqaalaha, Arimaha Bulshada iyo Siyaasada iyo Amniga kuwaas oo ay xukuumadda maanta jirtaa ay mudnaan balaadhan siisay.

Mar haddii uu Musuqu yahay, afo baabiinaysa ama lid ku ah 5ta arimood Ee xukuumaddani xooga saarayso, waxa muhiim ah in dagaalka koobaad lagu qaado Musuqa iyo wax-isdaba marinta. Waxa haboon in dhamaan xafiisyadda dawladdu ay ku lug yeeshaan hirgalinta mabaadiida maamul-wanaaga. Haddaba, KMW waxa ka go'an inuu dadaal adag u galo horumarinta maamul-wanaaga, lana ladagaalano aafada Musuqmaasuqa ee dilaaga ku ah dawladdnimadeena.

Sidaa darteed, waxaanu ka codsanayaa in dhamaan laamaha dawladda, qaybaha gaarka loo-leeyahay, bulshada rayidka ah, Culimada diinta iyo cid kasta oo reer Somaliland ahi ay si firfircoon oo waddaniyad ku dheehan tahay uga qayb-qaataan Hirgalinta Mabaadiida Maamul-wanaaga, iyadoo Qorshaha fog Ee KMW, 2021-2023 uu yahay tab aanu ugu talo-galnay in Komishanku ku xaqiijinayo arimaha aan kor ku soo sheegnay, waxaanu leeyahay aan dhamaanteen u diyaar garowno hawsha culus ee inoo taala qaran ahaan inagoo leh “ ***Aan hirgalino Mabaadiida Maamul-wanaaga, maadama oo ay yihiin furaha Horumarka Dhaqan-dhaqaale Ee Jamhuuriyadda Somaliland***”

Allaa Mahad leh,
Dayib Aadan Xaaji Cali
Gudoomiyaha KMW



Mahadnaq

Komishanka Maamul-wanaaga Qaranka Ee Jamhuuriyadda Somaliland wuxuu u mahadnaqayaa, madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland, Mudane, Muuse Biixi Cabdi iyo Guud ahaan Hay'addaha kala duwan ee Qaranka Ee ay wada shaqeynta leeyihiin Komishanka Maamul-wanaaga.

Waxa kale oo uu Komishanku qadarin- weyn siinayaa dhamaan Hay'addaha iyo Wasaaradaha dawladda Ee U soo gubiyey qorshe-hawleedkoodii 2020 Komishanku wuxuu u mahadcelinayaa dhamaan Ururada Bulshada, Jaamacadaha, Hay'addaha Caalamiga, Ururrada maxaliga ah iyo cidkasta oo danaynaysa in Maamul-wanaaga Qaranka kor loo qaado.

Ugu dambayn, hoggaanka iyo xubnaha Komishanku waxay u mahadcelinayaan dhammaan shaqaale-weynaha Komishanka Maamul-wanaaga Qaranka iyo Agaasimeyaasha Waaxyaha Komishanka oo si wayn isugu hawlay isku duba ridka, tifaftirka iyo soo saarista Warbixin Sannadeedka Komishanka Maamul-wanaaga.

Habraaca Diyaarinta Warbixin-Sannadeedka 2020 Ee KMW

Komishanka Maamul-wanaaga, wuxuu warbixintan ka diyaariyey qorsh-hawleedkiisii uu dejiyey 2020, wixii uga hirgalay iyo hawlgalo-kale oo muhiim u ahaa Komishanka, hase ahaatee aan ka mid ahayn Qorshahihii La dejiyey. Dhamaanba nuqulada warbixinaha waxa laga soo dheegtay, hawlgaladii uu Komishanku fuliyey oo ay gadhwadeen ka ahaayeen waaxyaha Komishanka. Dhamaan warbixinaha hawl-qabadka Komishanka waxa ururiyey, isla markaana si gaar ah u soo diyaariyey soona saaray waaxyaha Qorshaynta iyo Wacyigalinta Ee Komishanka Maamul-wanaaga.

Habka diyaarinta qorshahan ayaa ahayd in marka hore qiimayn lagu sameeyo Komishanka Maamul-wanaaga taasi oo ay ka qayb qaateen Madaxda, Agaasime-Waaxeedada, Madax qaybeedada iyo Hay'addaha kale ee dan-wadaagta la ah Komishanka. Waxa xigtay in dhamaan shaqaalaha loo qabto kulan ku saabsan istaraatiijiyada iyo waxay ka kooban tahay, kulankaasina uu socday muddo laba maalmood ah. Kadibna waxa la qabtay kulan guud oo lagu ansixiyay qorshe hawleedka Komishanka Maamul-wanaaga.

Guudmar (Abstract)

Sida uu dhigayo Qodobka 12aad Ee Xeerka Xeerka Komishanka Komishanka Maamul-wanaaga, xeer, Lam 58/2012, komishanka waxa ku waajiba inuu diyaariyo warbixin sannadeed dhamaystiran oo khuseeya waxqabadka Komishanka ugu dambeyn bisha February sannad-walba loona gubiyo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland. Warbixin Sannadeedka 2020 Ee Komishanka Maamul-wanaagu waxay ka kooban tahay 6 qaybood (cutub) oo si mug leh u iftiiminaya wixii Komishanka uga qabsoomay Qorshihii 2020 iyo hawlo- dheeraad ah oo uu Komishanku qabtay.

Haddaba Komishanka Maamul-wanaaga waxa u qabsoomay sannada 2020 hawlo badan oo muhiimad gaara qaran ahaan inoo leh. Waxa kale oo jiray in sanada 2020 uu safmareenkii COVID-19 uu saameeyey dhamaan qorsheyaasha Hay'addaha dawladda iyo isu socodkii dadwaynaha, Komishanka Maamul-wanaaguna wuxuu kamid ahaa hayadihii uu saamaynta ku yeeshay safmareenkaasi. Dadaalo badan kadib Komishanku, wuxuu sameeyey hagaha baadhista hay'addaha dawladda oo loogu tala galay in uu Komishanku adeegsado marka uu samaynayo baadhisaha si warbixinaha baadhisaha la xidhiidha ee Komishanku u noqdaan kuwa tayo iyo hab isku mid ah leh.

Waxa kale, oo uqabsoomay siyaasadaha Maamul-wanaaga, iyo siyaasada Xilwareejimaha qaranka, labadan siyaasadood waxaa loogu talagalay in ay saldhig u noqdaan toosinta maamulka hayadaha dawladda. Waxa hageyaal ay raacaan oo nidaamiya hawlahooda shaqo oo aan markii hore hab- iswaafaqsan lahayn loo diyaariyey dhamaan badhesaabada dalka iyo dhamaan dawladdaha hoose dalka oo sannadkan yeeshay hageyaal ay raacaan.

Waxa kale, oo uu Komishanku ku guulaystay inuu dhamaanba hageyaashaasi uu gaadhsiiyey xarumaha dawladda dhexe ee heer-gobol iyo dawladdaha Hoose, iyadoo xafiisyadda badhasaabada iyo Maayaradda dalka lagu qabtay kulamo uu Komishanka Maamul-wanaagu ku gudoonsiiyey hageyaashaasi masuuliyiinta ay khusayso. Komishanka Maamul-wanaaga ayaa hadda wixii ka dambeeyana ku qiimayn doona xarumaha dawladda dhexe iyo kuwa dawladdaha Hoose Ee dalka, iyadoo uu markasta kormeer iyo qiimayn ku tago xafiisyada Badhsaabada iyo Dawladaha Hoose.

Si loo hubiyo, heerka adeeg-bixinta hay'addaha dawladda Jamhuuriyadda Somaliland, Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu sannadkan 2020, hirgaliyey cilm-baadhista heerka Maamul-wanaaga Ee hay'addaha dawladda oo uu ka sameeyey 15 wasaaradood oo ka mid ah kuwa adeega bixiya.

Cilmi-baadhista oo ka mid ah Hawlaha ugu waaweyn ee u qabsoomay Komishanka, Sannadkan, waxa lagu waraystay 210 oo ka tirsanaa Wasaaradahaasi. Dadka ay Cilmibaadhistu xooga saartay waxay ahaayeen Maamulka sare ee Wasaaradahaasi sida, Agaasimaha Guud, Agaasime Waaxeedada iyo Madaxqaybeedyada, waxyaabaha ay xooga saartay daraasaduna waxa ka mid ahaa Mabaadiida Maamul-wanaagu sida uu uga dhexjiro hay'addaha Dawladda iyo Musuqmaasuqa. Wixii kasoo baxayna waxa loo qaban doonaa shir loo dhan yahay oo wasaaradaahsi ka soo qayb galaan.

Waxyaabah kale, ee Komishanka u qabsoomay oo kooban waxa ka mid ahaa kulamo loo qabtay saxaafada culimada isku duweyaasha Gobolka Maroodi Jeex, diyaarinta Qorshe Hawleedka Komishanka Komishanka ayaa isaguna ahaa hawlihii waaweynaa ee qabsoomay. Sannadan 2020 Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu taxliilin ku sameeyey Miisaaniyada Qaranka ee 2020. Dhanka kalena, waxa raacday in iyadana xooga la saaray sidii loo ogaan lahaa Hay'addaha dawladda ee qaada lacagta sharci darada ah.

Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu kormeer iyo qiimayn ku soo sameeyey Mashaariicaha ka socda Gobolada dalka, waxa sidoo kale, uu qiimayn ku sameeyey Xafiiska Guud ee Dab Damiska Qaranka ee magaalada Hargeisa, sidoo kale wax qiimeyn iyo kormeer lagu soo sameeyey Cisbitaalada iyo Wakaaladaha Biyaha dalka. Waxa kale, oo dib loo xoojiyey Xafiiska Cabashooyinka ee Komishanka oo loo sameeyay lambar kulul oo ah **9449 (Hotline)** oo muwaadiniinta tacdiga kala kulma masuuliyiinta Hay'addaha dawladda ay u soo caban karaan.

Ugu dambayntiina, Komishanka Maamul-wanaagu si uu kor ugu qaado Wacyigalinta bulshada wuxuu balaadhiyey Bartiisa Facebooka oo warka Komishanka gaadho oo bulshada aad u balaadhan. Sidoo kalena, waxa Waaxda Wacyigalinta loo iibiyey qalabka wacyigalinta oo ay ka mid tahay kamaradi si gaar uu Komishanku ugu adeegsanaya hawlihiisa shaqo si loo kaydiyo xogta waxqabadka Komishanka.

CUTUBKA KOOBAAD: Diyaarinta Qorshaha Fog Ee Komishanka iyo Dejinta Qorshaha 2020

1.1. Qorshaha-Fog Ee KMW 2021-2023 (Strategic Plan)

Qorsheyaasha Komishanka Maamul-wanaaga waxa kamid ahaa in uu helo qorshe hawleedkii uu ku hawlgali lahaa sanadaha 2021-2023. Haddaba isagoo komishanku og in Maamul-xumadda iyo musuqmaasuq dhib ku yihiin koritaanka dhaqaalaha, siyaasada, arimaha bulshada ee qarankeena iyo isagoo dhiirigalinaya in la helo dhaqan maamul-wanaag iyo hay'addo dawladeed oo ka caaqan musuqmaasuq, waxkastaana cad yihiin (transparent), isla markaana la helo saaxad maasuliyiinta Hay'addaha dawladda lagula xisaabtami karo, taasoo isku soo dhawaynaysa bulshada iyo masuuliyiinta dawladda dhexe isla markaana abuuraysa in kalsooniyi ka dhex dhalato.



Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu ku guulaystay in uu dhamaystiro qorshe hawleedkaasi. Waxa kale, oo qorshe-hawleedkan Komishanka Maamul-wanaagu kulan kala yeeshay, Wasiirka iyo Agaasimaha Guud ee wasaarada Qorshaynta Qaranka si ay u hubiyaan in uu waafaqsan yahay Qorshaha Hormarinta Qaranka ee (NDPII), waxaanay u xilsaareen Agaasimaha Waaxda qorshaynta ee Wasaarada oo

cadeeyey in uu waafaqsan yahay qorshaha hormarinta Qaranka. Arimaha sadexdaasi sanadood uu xooga saarayo waxa kamid ah:

- ▽ **Dhisida Awooda Komishanka Maamul-wanaaga (Institutional building):** Komishanka Maamul-wanaaga waxa mudnaanta koobaad u ah, in uu awoodiisa dhinaca toosinta iyo Ladagaalanka Musuqmaasuqa dhiso si ay ugu fududaato in uu fulin karo hawlaha uu qaranka ugu xilsaaran yahay.
- ▽ **Daraasadaha iyo Cilmibaadhista (Research and Studies).** Inta badan xog sax ah lagama hayo waxa sababa dhibaatooyinka maamul-xumadda iyo musuqmaasuqa, sidaa darteed Komishanka maamul-wanaagu waxa mudnaanta labaad u ah in Komishanku cilmibaadhiso qoto dheer oo dalka oo dhana ku sameeyo arimaha musuqmaasuqa iyo maamul-wanaaga, si uu u curiyo barnaamijyo lagula dagaalami karo musuqmaasuqa muda dhaw iyo ta dheerba isla markaana uu hiniso barnaamijyo maamulka suuban lagu hor marin karo.
- ▽ **Dib u habaynta Shuruucda iyo Siyaasadaha:** Mudnaanta sadexaad Komishanka Maamul-wanaaga waxa u ah in uu saxo gol dalooliyinka shuruucda iyo siyaasadaha, curiyana siyaasadaha lagula dagaalamayo musuqmaasuqa isla markaana lagu hormarinayo maamulka suuban.
- ▽ **Wacyigalinta bulshada:** Mudnaanta Afraad Komishanka Maamul-wanaaga waxa u ah ka wacyigalinta bulshada dhibaataada musuqmaasuqa.
- ▽ **Dib u eegida nidaamka maamul ee Hay'addaha dawladda:** Mudnaanta shanaad Komishanka Waxa u ah dib u habaynta nidaamka maamul ee hayadaha dawladda. Talabaada koobaad ee komishanku qaadayo waa inuu dib u eegis ku sameeyo sharciga aas aaska hayadaha, shuruucda iyo siyaasadahooda, kartidooda, waxqabadkooda, taasi oo kor u qaadaysa adeegyada ay dadwaynaha u hayaan oo ku salaysan banyaalnimo, isla xisaabtan iyo ku dhaqanka sharciga. Habka diyaarinta qorshahan ayaa ahayd in marka hore qiimayn lagu sameeyo Komishanka Maamul-wanaaga, taasi oo ay ka qayb qaateen Madaxda, Agaasimeyaasha waaxyaha, Madax qaybeedada iyo Hay'addaha kale ee dan wadaagta la ah Komishanka. Waxa xigtay in dhamaan shaqaalaha loo qabto kulan ku saabsan strategiyada iyo waxay ka kooban tahay kulankaasina uu socday mudo laba maalmood ah.

1.2. Dejinta Qorshaha KMW (2020)

Komishanka Maamul-wanaaga, waxa uu bilowgii, 2020 dejiyey qorshe-cad oo loogu talo-galay in Komishanku raaco. Qorshaha sannadka oo falaqayntiisu ku qabsoontay Hotel Grand Haddi, Ee Magaalada Hargeisa, waxaana ka soo qayb-galay Gudoomiyaha, Gudoomiye Xigeenka, Agaasimaha Guud, Agaasime Waaxeedada, Madax qaybeedada iyo shaqaale Weynaha KMW. Kulankani wuxuu socday mudo sadex maalmood ah. Waxa waax waax looga dhagaystay waxa ugu jiray qorshaha, intaa dabadeedna waxa la saaray gudi ka kooban Gudoomiye Xigeenka, Agaasimaha Guud iyo koox kamida Agaasime waaxeedada. Waxa mar labaad la iskugu yimid kulan maalintii xigtay, waxaana la diyaariyey qorshe dhamaystiran oo Komishanku ku hawl galay sanadka 2020. Gudoomiyaha komishankuna ansixiyey in lagu hawlgalo. Qorsheyaashii komishanku qaato inuu sannada 2020 fuliyo waxaa ka mid ahaa kuwan hoos ku xusan.

- Diyaarinta Qorshe hawleedka (Stratejiyada) Komishanku ku hawl galayo sanadaha 2021-2023.
- Diyaarinta Hagaha Baadhista Hayadaha Dawladda (Investigation Manual)
- Qiimaynta Wax qabadka Hayadaha Dawladda
- Siyaasada Maamul-wanaaga
- iyo siyaasada Xilwareejinta
- Cilmibaadhis dhinaca Maamul-wanaaga Hayadaha dawladda taabanaysa.
- Dib uhabaynta Hayadaha Dawladda (Ministry reform)
- Ku tababarida saxaafada doorkooda maamul-wanaaga (Media Role on Good Governance)
- Qabashada kulanka culimada,
- Tababarka shaqaalaha komishanka.
- Barnaamijka wacyigalinta
- Baadhista cisbitaalada, Wakaaladaha Biyaha, Kastamada iyo Xarumaha cashuuraha beriga.

Intaa waxa soo raacay hawlgalo kale oo Komishanka Maamul-wanaaga aan ugu jirin qorsheyaashiisa, laakiin ay baahidu keentay in iyagana wax laga qabto. Kuwaana waxa ka mid ahaa.

- Falanqaynta iyo dersida Miisaaniyada Qaranka 2020 oo uu Komishanku ka eegayey doorka kaga aadan.
- Xog ururinta Hayadaha iyo Wasaaradaha qaada lacagta sharci darada ah
- Ururinta iyo daraasaynta qorsheyaasha sanad laha ah ee Hay'addaha dawladda qaar ka mida.
- Furida Xafiiska cabashooyinka Komishanka Maamul-wanaaga
- Hagaha badhasaabada Gobolada dalka.
- Ururinta Qorshe-hawleedyadda Hay'addaha dawladda Ee 2020 oo uu Komishanku baadhis iyo taxliilin ugu sameeyo.



CUTUBKA LABAAD: Hageyaasha, Habraacyadda, Siyaasadaha iyo Cilmi-baadhisaha

2.1. Hagaha Baadhista iyo Qiimeynta Hay'addaha Dawladda

Komishanka Maamul-wanaaga isagoo ka duulaya ahmiyada ay leedahay in kor loo qaado maamulka Hay'addaha dawladda ah, loona wanaajiyo hufnaantooda shaqo, ayuu diyaariyey Hagaha Baadhista iyo Qiimeynta Hay'addaha Dawladda, JSL. Hagahani waa agab (document) ay adeegsan doonaan hawl-wadeenada ka socda KMW Ee ku guda jira hawlaha iyo shaqooyinka uu Komishanku u igmado, waxaanu fudaydinayaa habraacyada Baadhista iyo Qiimeynta Ee Komishanku waddo.


Waxa kale, oo hagahani xambaarsan yahay nidaamyo (habab) dhowr ah oo lagu soo ururinayo xogaha iyo macluumaadyada la-xidhidha arimaha maamul-wanaaga dalka. Si natiijada ka soo baxdaa ay u noqoto mid lagu go'aan qaadan karo ama ay uga soo baxaan talooyin wax laga qaban karo goldaloolooyinka la ogaaday.

Ujeedooyinka hagahani waxay daaran yihiin in la qiimeeyo heerka fahamka daneeyaasha maamul-wanaaga, Qiimeynta heerka uu marayo Maamul-wanaaga iyo u-kuurgalida Caqabadaha hortaagan in la helo waxqabad iyo adeeg-bixin ku suntan tiirarka maamul-wanaaga. Meelaha uu hagahani diirada saarayo waxa ka mid ah; Qiimeynta Qaab-dhismeedka, Maamulka iyo Qorsheyaasha, Adeeg-bixinta iyo Isla-xisaabtanka, Maamulka Shaqaalaha iyo Maaliyadda Hay'addaha Dawladda.

Waxa kale, oo hagahani tilmaamayaa in qiimeynta Hay'addaha dawladdu u marayo sadex mar-xaladood oo kala;- Qiimeynta Bilowga ah (primary Assessment), Qiimeynta ka dabataga ah (follow-up Assessment) iyo Baadhista (Investigation). Baadhista iyo Qiimeynta kadib, waxa uu Komishanku soo saari doonaa Warbixin dhamaystiran oo taabanaysa heerka Maamul-wanaaga ee Hay'ad ama



Wasaaradeed. Haddaba si uu hagahani u noqodo mid sal-balaadhan, isla markaana dhamaystiran, Komishanka waxa uu u qabtay kulan lagu shaacinayey hagaha baadhista iyo Qiimeynta taariikhdu markay ahayd 19th July, 2020.



Gudoomiyaha Komishanka Maamul-wanaaga, Mudane, Dayib- Adam Haji Cali oo Furitaanka Kulanka hadal ka jeediyey ayaa sheegay inuu yahay hagihi koowaad ee Loo sameeyo Komishanka Maamul-wanaaga, iyadoo warbixinada ka soo baxa marka lagu hawlgalo uu Komishanku la wadaagi doono daneeyaasha ay ugu horeeyaan Madaxweynaha Somaliland, iyo Hay'addaha ay bah-wadaagta leeyihiin Komishanka Maamul-wanaaga ee Jamhuuriyadda Somaliland. Kulankan waxa ka soo qaybgalay madaxda Hay'addaha dawladda ee hagahani khuseeyo.






2.2. Diyaarinta Siyaasada Maamul-wanaaga

Komishanka Maamul-wanaaga sannadka 2020 wuxuu diyaariyey Siyaasada Maamul-wanaaga Qaranka JSL, oo loogu talo-galay inay hagto nidaamka Maamul-wanaag ee dalka. Baaxada siyaasadan ayaa ah inay astaan u noqoto sida ay soomaliland uga go'antahay hirgalinta haykal dawladeed oo oo ku suntan maamul-wanaag. Siyaasadani waxay dhamaystiraysaa habraaca dabagalka iyo iyo isla xisaabtanka hayadaha dawladda iyo bixinta adeegyada dadweynaha lasiiyo. Siyaasadani waa mid loogu tala galay inay Hay'addaha dawladda u noqoto mid uga turjunta Heer anshax si maamul-wanaagu u hirgalo. Siyaasadni waxay adeegsanaysaa arimahan hoos ku xusan:-

- Abuurida habraacyo lagaga hortagayo, laguna aqoonsanayo isla markaana lagu maamulayo xaaladaha maamul xumada iyo musuqmaasuqa.
- Xoojinta hawlaha maamul-wanaaga iyo ladagaalanka musuqmaasuqa ee ku aadan qiimaynta iyo baadhista Hay'addaha dawladda.

- In ay caawiso laamada dawladda ee hawsha Komishanka Maamul-wanaagu khusayso si la isula jaanqaado.
- Iyo xakamaynta xaaladaha keeni Kara musuqmaasuq iyo maamul xumo.

Siyaasadan oo komishanku dhamaystiray 2020, waxa loo gudbiyey Golaha Xukuumadda si loo ansixiyo, isla markaana, Komishanka Maamul-wanaaga ugu suuragasho inay qiimayn dhab ah ku sameeyaan dhamaan Hay'addaha dawladda, maadaama oo la joogo xilligii uu Maamul-wanaagu ka hana qaadi lahaa dhamaan gayiga Somaliland.



2.3. Habraaca Xilwareejinta Qaranka

Kadib sannado badan oo xilka masuuliyiinta la magaacabo iyo kuwa xilka laga qaadaa la kala wareegayeen masuuliyada maamulka Hay'addaha dawladda, Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu u dhabagalay hanaanka xilwareejinta Hay'addaha qaranka JSL. Wuxuu ogaaday in aanay jirin nidaam cad oo qeexaya sida xilka loola kala wareegayo iyo in aanay jirin cid hubisa hantida lala kala wareegayo, taasi oo keentay in la yidhaahdo masuuliyiin ayaa la tagay agab xafiis ama in la waayo agab ku jira hantida dawladda.

Haddaba si looga baxo dhibtaadaa jirta Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu u arkay in xil wareejimaha Qaranka la waafajiyo nidaamka maamulka suuban,

waxaanu markii ugu horaysay curiyey Habraaca xilwareejimaha Qaranka. Ujeedooyinka habraacan waxaa ka mid ah kuwan hoos ku xusan.

1. *In xilwareejintu u dhacdo si waafaqsan shuruucda dalka iyo hanaanka maamulka suuban*
2. *In masuulka xilka hayaa si habsami ah ugu wareejiyo xilka masuulka cusub dhamaan wixii macluumaad/agab ah ee shaqada la xidhiidha ee uu gacanta ku hayo.*
3. *In masuulka xilka katagayaa aanu la tagin wax xog ah oo shaqada la xidhiidha sida diwaanada Emailada ee uu gacanta ku hayo.*
4. *In wixii habraaca ama siyaasada ee shaqada la xidhiidha masuulka cusubi markiiba helo.*
5. *Iyo in masuulka cusubi si deg deg ah uu shaqada socota iyo hawl wadeenadeedaba ula qabsado.*

Habraacani wuxuu si cad u sheegayaa waxa lala kala wareegayo, cida lagu wareejinayo, waqtiga la wareejinayo, cida la kala wareegaysa, habraaca xilwareejinta iyo saxeexayaasha xilwareejimaha. Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu habraacan u gudbiyey Golaha Wasiirada oo uu ka sugayo in ay soo ansixiyaan. Waxaanu dariiq cusub u jeexi doontaa nidaamka xilwareejimaha qaranka.



2.4. Cilmi-Baadhista Maamul-wanaaga Ee Hay'addaha Dawladda

Komishanka Maamul-wanaaga wuxuu sannadka 2020 diyaariyey Cilmbaadhista Maamul-wanaaga, waxaanay daraasadani xooga saartay 15 Wasaaradood oo bixiya adeega dadwaynaha, waxaana xogta cilmi-baadhistan laga soo ururiyey 210 qof oo ka mida Maamulka sare ee Wasaaradahaasi, sida Agaasimeyaasha Guud, Agaasime-waaxeedada iyo Madax-qaybeedyada.

Waxyaabihii kasoo baxay daraasada Maamul-wanaaga ee Komishanka Maamul-wanaagu ka fuliyey Wasaaradaha dawladda, waxa lagu soo bandhigay munaasibad balaadhan oo Komishanku u qabtay bishii December, 2020 kana dhacday, Hudheelka Baraar. Munaasibada Shaacinta Natijada Cilmi-baadhistan ayaa waxa ka soo qayb-galay, Gudoomiyaha KMW, Mudane, Dayib Adam Haji Ali, Agaasimaha Guud Ee Maamul-wanaaga, Mudane Maxamuud Ismaaciil Cilmi(Deeq), Gudoomiyaha Gobolka Maroodi Jeex, iyo qaar ka mid ah Agaasimeyaasha Guud Ee Hay'addaha dawladda Ee cilmi-baadhistan lagu sameeyey.

Agaasimaha Guud ee Komishanka Maamul-wanaaga oo hadal ka jeediyey munaasibada shaacinta Natijada ka soo-baxday cilmi-baadhistan ayaa tilmaamay inay natijada daraasadani muhiim u tahay Qaranka Jamhuuriyadda Soomaaliland, isagoo u mahadceliyey masuuliyiinta Xukuumadda Ee ka soo qay-galay shaacinta Natijada Cilmi-baadhista Heerka Adeeg-bixinta Hay'addaha Dawladda oo muddo soo-socotay.


Dhamaan Masuuliyiintii hadalka ka jeediyey munaasibadan waxay hoosta ka xariiqeen in aad loogu baahan yahay hirgalinta talooyinka ay soo jeedisay cilmi-baadhistani si aan u tayeyno hanaanka Maamul-wanaaga xafiisyadda dawladda, waxaanay Komishanka ka codsadeen in sannad-walba cilmi-baadhis noocan oo kale ah, la sameeyo si loo ogaado heerka maamul-wanaaga ee adeeg-bixinta Hay'addaha dawladda.

Gudoomiyaha Komishanka Maamul-wanaaga, Mudane Dayib Aadan Xaaji Cali ayaa soo gunaanaday Kulanka, waxaanu sheegay in natijada Cilmi-baadhistani uu Komishanka Maamul-wanaagu ku ogaaday halka uu taagan yahay heerka Adeeg-bixinta Hay'addaha dawladdu, waxaanu xusay inay joogtayn doonaan cilmi-baadhisaha noocan oo kale, si Komishanka Maamul-wanaagu u la socdo heerka ay' Hay'addaha dawladdu ka taagan yihiin mabaadiida Maamul-wanaaga. Waxaanu xusay in sannadka 2021 ay kor u qaadi doonaan firfir ay bulshadu ka qabto

maamul-wanaaga oo ay daraasadani iftiimisay inuu hooseeyo, sidaa darteedna, Komishanka Maamul-wanaagu uu sannadka 2021 bilaabi doono wacyigalin balaadhan uu bulshada ku fahamsiinayo maamul-wanaaga, waxaanu xusay inay si dhaw u la shaqayn doonaan Gobolada iyo Degmooyinka dalka. Ugu dambayntiina magacyada wasaaraddaha laga sameeyay cilmi-baadhistan waxay kala yihiin:-

1. Wasaaradda Arimaha Dibada iyo Iskaashiga Caalamiga ah.
2. Wasaaradda Shaqo-gelinta, Arimaha Bulshada iyo Qoyska.
3. Wasaaradda Arimaha Gudaha.
4. Wasaaradda Horumarinta Beeraha.
5. Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka.
6. Wasaaradda Cadaalada.
7. Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka.
8. Wasaaradda Ganacsiga, Wershadaha iyo Dalxiiska.
9. Wasaaradda Horumarinta Khayraadka Biyaha.
10. Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda.
11. Wasaaradda Tamarta iyo Macdanta.
12. Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka iyo Wacyigelinta.
13. Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska.
14. Wasaaradda Deegaanka iyo Horumarinta Reer Miyiga.
15. Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka.





CUTUBKA SADEXAAD: Kormeeradda, Dabagalka iyo Baadhisaha

3.1. Doorka Komishanka Ee Falan-qaynta Miisaaniyadda 2020

Komishanka Maamul-wanaaga wuxuu falanqayn qoto-dheer ku sameeyey Miisaaniyada qaranka ee 2020. Hadafka guud ee Komishanka Maamul-wanaaga uu ka lahaa dib-ueegista iyo falanqaynta waxa ka mid ahaa in Komishanku ogaado Madaxyadda Miisaaniyada Ee dhiig baxa ku ah Qaranka, xoojinta, wada-shaqaynta iyo isku-xidhka Hay'addaha Dawladda, Horumarinta Adeegyada Bulshada Ee ay Hay'addaha xukuumaddu u xilsaaran yihiin iyo in marka Miisaaniyadda la diyaarinayo lagu saleeyo awoodaha sharci Ee Hay'addaha dawladda (Mandates) si aanay u dhicin in Madax lagu qaban karo shaqo kaliya, aan loogu darin wasaarado ama hay'ado awoodooda sharci kala duwan yihiin.

Waxa kale, oo uu Komishanku uga dan-lahaa inuu ka talo-bixiyo in Madaxyadda aan daruuriga ahayn laga saaro Miisaaniyadda Qaranka ama kharashkooda aad loo dhimo. Haddaba, Komishanka Maamul-wanaaga waxa uga soo baxday Dib-ueegista iyo Falanqayntan in Kharash badani uu Qaranka kaga baxo Dhismeyaasha, Iibsiga Gaadiidka, Shidaalka, Dayac-tirka iyo Saliidaha, Tababarada iyo Imtixaanada, Diyaarinta, Dib-ueegista iyo Faafinta shuruucda, Iibsiga qalabka Boosaha iyo Isgaadhsiinta iyo madaxyo kale oo badan.

Ugu dambayntii, Komishanka Maamul-wanaagu, wuxuu uu soo jeedinayaa in sida ugu dhaqsaha badan loo abuur, Kaalinta Shidaalka Qaranka. Si kor loogu qaado wada-shaqaynta Hay'addaha Dawladda, waxa haboon in dhamaan dhismeyaasha, iibsiga Gaadiidka iyo dacyactirkooda lagu wareejiyo Wasaaradda Hawlaha Guud, Guryeynta iyo Dhulka. Sida warbi xintu cadaysay, waxa lagama maarmaan ah, in dhamaanba Madaxyadda Warbixintu sheegtay in la hoos geeyo Wasaaradaha iyo Hay'addaha ay khuseeyaan si loo dhimo kharashka xad-dhaafka ah, isla markaana loo xaqiijiyo in shaqooyinka Hay'aduhu noqdaan kuwo sugan oo waxqab leh.

Dhanka kale, Komishanka Maamul-wanaagu sida aad ka arki doontaan warbixinta baadhista Miisaaniyada Qaranka wuxuu ka eegay dhinaca sharciga, isagoo is waafajiyey madaxa Miisaaniyada ee ugu jira Wasaarado badan wasaarada ama hayada sharciga iyo awooda u leh in loo wareejiyo sida madaxyadada shidaalada, faafinta shuruucda, cilmibaadhisaha iyo qaar kale oo badan. Wasaaradaha uu sharciga iyo Miisaaniyadooda isla eegayna waxa kamida:

1. Wasaaradda Gaadiidka & Horumarinta Jidadka
2. Wasaaradda Isgaadhsiinta & Tiknoolajiyada
3. Wasaaradda Warfaafinta, Wacyigalinta & Dhaqanka
4. Wasaaradda Arimaha Dibada & Iskaashiga Caalamiga
5. Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta
6. Wasaaradda Hawlaha Guud, Dhulka iyo Guryeynta
7. Wasaaradda Ganacsiga, Warshadaha & Dalxiiska
8. Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda
9. Wasaaradda Dhalinyarada & Ciyaaraha
10. Wasaaradda Arimaha Gudaha
11. Golaha Guurtida
12. Xafiiska Garyaqaanka Guud
13. Komishanka Dib Habaynta Shuruucda
14. Hay'adda Shaqaalaha Dawladda
15. Madbacada Qaranka
16. Komishanka Maamul Wanaaga.

3.2. Hubinta Qorsheyaasha Wasaaradaha & Hay'addaha Dawladda

Somaliland 2011-kii ayay markii koowaad samaysatay Qorshaha Horumarinta Qaranka (QHQ), kaasoo kamid ahaa qorsheyaal is xig xigay oo la isku raac raaciyey shan-shan sano (Five year Plans) oo lagu gaadhayo Hiigsiga Qaranka Somaliland ee 2030 (Vission 2020).

Qorshaha Horumarinta Qaranku ujeeddadiisu waxa weeyi in lagaga gudbo caqabadaha qaab-dhismeedka leh ee dhinaca horumarinta ee ku gudban Somaliland isla markaana lagu guulaysto isbeddel dhaqaale iyo mid bulsho oo qaranka u hor seeda ladnaan, si taas loo gaadhana seeska loo dhigo meerto-hawleed heerkeedu sarreeyo, hay'ado dawli ah oo xooggan, kaabeyaal dhaqaale oo horumarsan, shaqaale xirfad leh, hay'addo dawladeed oo ku suntan maamul wanaag iyo in la

kordhiyo fursadaha saacidaya in dadka Somaliland ay ka midho-dhaliyaan hiigsigooda.

Haddaba, Dawladda Somaliland waxa ka go'an inay hay'ad waliba yeelato qorshe sanadeed ama istaraatiijiyad laga dheegano qorshaha horumarinta qaranka ee labaad, lana waafajinayo buuga balanqaadka xisbiga oo ka kooban todobada tiir. Sidaa darteed komishanka maamul wanaaga wuxuu qiimayn ku sameeyey taariikhdu markii ay ahayd 10/11/2020.

Ujeedooyinka Komishanku ka lahaa inuu qiimayn iyo hubin ku sameeyo qorsheyaasha hayadaha iyo Wasaaradaha kor ku xusan waxay ahaayeen,

- ▽ In komishanku xaqiijiyo qorshe sanadeedka 2020 ee Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Dowladda.
- ▽ In komishanku darso Wasaaradaha iyo Hay'addaha madaxa banaan ay raacaan qorshaha horumarinta qaranka ee labaad iyo buuga balanqaadka xisbiga.
- ▽ In komishanku ogaado wixii ka qabsoomay qorshayaashooda sannadka 2020 iyo wixii aan ka qabsoomin.

Qiimayntan Komishanka Maamul-wanaaga waxa uga soo baxay, in qorshayaasha hay'addaha qaranku aanay wada socon, iyadoo hay'ad waliba ay qorsheheeda ku salayso qorshe mashruuc dhaqaale iyo inanay raacin qorshaha horumarinta qaranka ee labaad.

Sidoo kale, waxa qorsheyaasha ku yimaada dib-u-dhac ay sababto ka go'naansho la'aan, iyadoo wakhtigii loo asteeyay fulintooda aan la ilaalin, hawl-wadeenada fulinaya qorsheyaasha oo aan lahayn aqoontii qorshayneed, Nidaamka Qorsheyaasha (format) oo aan laga sinayn, warbixinahooduna kala duwan yihiin, iyadoo qaarkoodna warbixinahaasi ay ku qoran yihiin luuqado qalaad. Haddaba, Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu talo-ku soo jeedinayaa qodobadan hoos ku xusan:-

1. Waa in Qorsheyaasha Hay'addaha dawladdu ku xidhnaadaan Qorshaha Horumarinta Qaranka si loo helo jiho la raaci karo, loona gaadho horumar waara.
2. Waa in Hawlaha shaqo Ee la qorsheeyey u fulaan sidii loo asteeyey si looga fogaado dib-udhac badan Ee ku imanaya.

3. Waa inay isku xidhnaadaan qorshaha Hay'addaha dawladda iyo Miisaaniyadahoodu.
4. Waa inay Hay'addaha dowladdu marka ay dejinayaan qorsheyaasha, waxqabadkooda, iyo warbixinahooda ay ku qoraan luuqadda afsoomaaliga.
5. Waa inay hay'addaha dowladu raacaan nidaam (format) ay ka siman yihiin marka ay samaynayaan qorshayaashooda.
6. Marka ay timaado xaalad degdeg ah sida Covid 19 oo kale, waa in aan hakad lawada galin kharashka Hawlaha shaqo Ee Hay'addaha Qaranka ee loo eego sida ay u kala muhiimsan yihiin, iyadoo qaybaha xaalada timid ay saamaynayso uun la hakinayo.
7. Komishanku waa inuu qorshe ka yeesho sidii loo kala saari lahaa hay'addaha isku haysta waajibaadkooda shaqo (mandates).

Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu joogtayn doonaa in uu qiimayn sannadle ah ku sameeyo qorsheyaasha Wasaaradaha iyo Hay'addaha kala duwan si uu u xaqiijiyo in aynu hayno wadadii qaranku horumarka ku gaadhi lahaa, isla markaana saxo ama tilmaamo meelaha toosinta Maamuleed u baahan.

3.3. Baadhista iyo Dabagalka Xarumaha Dakhliga

Baadhista iyo Dabagalka Xarumaha Dakhli ururinta dalku waxay muhuhiim u yihiin in la ogaado heerka dakhliga Ee xarumahan ka soo xerooda. Maadama oo aan doonayno in aan hirgalino Maamul-wanaag, waxa waajib ah in Kormeero ama dabagal lagu sameeyo dhamaan goobaha dakhliga dalka. Haddaba sanadkan 2020, Komishanka Maamul-wanaaga iyo Ladagaalanka Musumaasuqu wuxuu baadhitaano iyo dabagal ka fuliyey gobolada Awdal iyo Gabiley, gaar ahaan gobahan hoos ku xusan:-

- ∇ Kastamka Boorama.
- ∇ Kastamka Wajaale.
- ∇ Kastamla Kalabaydh.
- ∇ Cashuuraha Berriga Boorama
- ∇ Cashuuraha Berriga Wajaale
- ∇ Cashuuraha Berriga Gabiley



Ujeedada uu Komishanku ka lahaa Barnaamijka dabagalka iyo Baadhistu waxay daarnaynd u kuurgalid habsami u socodka hawlaha shaqo Ee Goobaha dakhli ururinta, hubinta inay jiraan wax la xidhiidha Musuqa iyo baadhista maamulka maaliyadeed goobahan dabagalka lagu sameeyey. Komishanka Maamul-wanaaga, waxa uga soo baxay hawlgalkan qodobadan hoos ku xusan:-



1. Komishanka Maamul-wanaaga waxa uu soo arkay in Kastama qaarkood aanay cashuurin qaybo ka mid ah qaadka soo mara, sida kasta Borama oo kale. Komishanku waxa uu amar ku bixiyey in hanaanka cashuurida qaadku ay noqoto mid laga siman yahay oo muwaadiintu raali ku yihiin. Sidaa darteed, Komishanku waxa arinta Lawadaagay Wasaaradda Maaliyadda oo isla-markii ay heshay Warbixinta Komishanka talaabo adag ka qaaday hawl-wadeenadii kastamka Borama Ee Gorayo-cawl.
2. Komishanka waxa uu ogaaday in dhamaan kastamada kale Ee Kor ku xusani maamulkoodu aad u wanaagsanaa. Sidaa darteedna Komishanku wuxuu Wasaaradda Maaliyadda ku booriyey in abaal-marin dhirigalined la siiyo.
3. Dhinac kale, Komishanku waxa uu ogaaday in dhamaan xarumaha Cashuuraha Berrigu uu nidaamkood shaqo aad u wanaagsanaa, balse ay caqabadi ka jirtay nidaamka Qiimeynta Cashuurta Macaash-macaashka Ee Laga qaado ganacsatadu aanay la hayn habraac qiimeyneed oo laga wada siman yahay. Taas oo keentay in ganacsatadu ay aad uga cawdaan cashuurta macaashul-macaashku oo aad u badan. Si arinta wax looga qabto, Komishanka Maamul-wanaagu waxa uu kulamo lagu toosinayo hanaanka midaynta cashuurtan la qaatay Wasaaraddaha Maaliyadda iyo Ganacsiga oo hadda ku guda jirta sixitaanka arintan.



3.4. Baadhista, Dabagalka Hay'addaha Dawladda Ee Qaadda Lacagaha Sharci-darada

Komishanku isagoo ka duulaya waajibaadkiisa shaqo, wuxuu kormeer baadhis iyo dabagal ku soo maray qaar ka mida Xarumaha Dowladda, halkaas oo uu u kuur galayay Wasaaradaha iyo Hay'addaha qaada lacagta sharci darada ah ee aanu u jidaynayn xeerkoodu inay uruuriyaan, sidoo kale, wuxuu eegay qaabka ay lacagtaa ugu xereeyaan dowlada iyo qaabka ay u maamulaan.

Komishanku wuxuu uga danleeyahay kormeerkan baadhitaan in la helo ummad ka fayooow dhamaan noocyada musuqa, iyo in kor loo qaado dakhliga dalka. Hay'addaha iyo Wasaaradaha uu Komishanku baadhista ku sameeyey waxay kala ahaayeen;

1. Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka.
2. Wasaaradda Hawlaha Guud & Dhulka iyo Guryeynta.
3. Wasaaradda Shaqo-galinta, Arimaha Bulshada iyo Qoyska.
4. Wasaaradda Ganacsiga, Wershedaha iyo Dalxiiska.
5. Wasaaradda Horumarinta Caafimaadka.
6. Wasaaradda Qorsheynta iyo Horumarinta Qaranka.
7. Wasaaradda Arimaha Gudaha.
8. Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska.
9. Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta.
10. Guddida Qandaraasyadda Qaranka.
11. Hay'adda Duulista iyo Hawadda Sare.

Haddaba Komishanka Maamul-wanaaga waxa uu hawlgalkan ku ogaaday inay jiraan Wasaaraddo qaada dakhli aanay sharci u haysan, isla markaana aan loo xerayn Wasaaradda Maaliyadda oo sharciyan awood u leh inay dakhli qabato.

Sidaa darteed, Komishanka Maamul-wanaaggu, waxa u soo baxday in qaarkood, Hay'addaha aan kor ku xusnay inay diyaar u yihiin inay qaadista lacagahaas ku wareejiyaan Wasaaradda Maaliyada, halka qaarkoodna hore u wareejiyeen, marka laga tago, Hay'adda Qandaraasyadda Qaranka oo Xeerkeedu Siinayo inay qaadi karto Lacag una adeegsato Shaacinta Mashaariicda iyo Hawlaha kale Warbaahinta.

Haddaba Komishanku wuxuu soo jeedinayaa in lacagahan wasaaraddaha iyo hay'addaha qaarkood qaadaan siyaasad guud oo cad laga yeesho si maamulka maaliyada loo waafajiyo nidaamka maamul-wanaaga, laguna wareejinayo Wasaaradda Maaliyada. Komishanku waxa uu sidoo kale, Wasaaradda Maaliyadda u soo jeediyey inay qiimeyn ku samayso baahiyaha Wasaaradaha iyo Hay'addaha Lacagahan qabta u adeegsadaan, kadibna Dariiqo Sharciyeysan wax lagu siiyo.

3.5. Dabagalka Mashaariicaha Laga Fuliyeey Gabiley, Wajaale iyo Borama

Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu kormeer iyo qiimayn ku soo sameeyey mashaariico badan oo laga fuliyey gobalka Gebiley. Mashaariicdaasi oo ay ka mid ahaayeen waddooyin iyo dhismayaal. Waxay dawladda Hoose Ee degmada Gabiley dhistay 4 sariibadood oo badhna dhamaadeen, qaarna ay gabo-gabo ku dhaawaayeen. Waxa sidoo kale, la dhisay 4 xanaano oo laba ka mid ahi ay hadda dhamaadeen, dawladda hoose Gabileyna maamusho, iyadoo kharashka ku baxa adeegyada ay xanaanooyinku bixiyaan, masuuliyadiisa ay qaaday dawladda hoose.

Mashaariicaha la fuliyey waxa kaloo ka mid ah sal-dhig bilays oo laga hirgaliyey xaafadda New Gabiley, halka mid kalena laga hirgaliyey degmada Agabar. Sidoo kale, waxa waddo loo dhisay degmada Arabsiyo, iyadoo dawladda Hoose Degmada Gabiley ay ka qayb-qaadatay dhismaha Waddada Arabsiyo ilaa Allaybaday.

Xilligaa waxa kale, oo socday Dugsiga Kambarwaaqo Ee degmada Allaybaday. Komishanku wuxuu kormeer ku soo sameeyey dhismaha Xarunta Akhriska Ee Gobolka Gabiley iyaduna markaa socday. Sidoo kale, waxay dawladda Hoose Ee Gabiley gacanta ku hayeen Saylada Xoolaha oo ka socotay cidhika magaalada. Waxa xusid muddan inay dawladda hoose dugsiyo hoose dhexe ka dhiseen magaalooyinka KUUSHLAY iyo ISHA-GUBAN. Halka ay degmada Wajaalena ka fuliyeen xarun caafimaad iyo dugsi waxbarasho. Dawladda Hoose, waxa kale oo ay dayactireen dugsiyada MUXUMED WARSAME, SHEEK TUSBAXLE, LAAMALOOSKA, ARABSIYO ALLAYBADAY iyo GEED-BALAADH.

Dhinaca, degmada Boorama, wuxuu Komishanku kormeeray mashaariico gacanta lagu hayey oo ay ka mid ahaayeen, dhismaha Biriishka Camuud, Xabsiga Cusub Ee Borama iyo Dhismaha Xafiiska Hay'adda Ka hortaga Aafooyinka iyo Kaydka Raashinka Qaranka. Dhamaanba mashaariicaha ka socday Gabiley iyo Borama, Komishanka wuxuu ku sameeyey kormeer uu ku-dul-istaagay iyadoo mashaariicahaas ay si wanaagsan socdeen.





3.6. Kormeerada Hay'addaha Dawladda

3.6.1. Kormeerka iyo Qiimeynta Dawladdaha Hoose Ee Dalka

Komishanka Maamul-wanaaga wuxuu Kormeer iyo Qiimeyn ku soo sameeyey Dawladdaha Hoose Ee Gabiley iyo Borama, iyadoo ujeedada Komishanku ahayd in qiimeyn uu ku sameeyo nidaamkooda shaqo iyo shaqaale, iyo darsida in wax laga ogaado si ay u fuliyaan mashaariicda horumarinta dawladdaha hoose Ee laga maal-galiyo, JPLG.

Waxa kale, oo muhiim u ahayd in Komishanku ogaado sida ay miisaaniyadahood u diyaariyaan una fuliyaan. Sidaa darteed, Komishanka waxa uga soo baxday in maamulka dawladdaha hoose Borama iyo Gabiley u baahan yihiin in lagu tababaro Mabaadiida maamul-wanaaga iyo in loo diyaariyo hagayaal ay raacaan marka ay u adeegyaan bulshada. Qiimeyntaa kadib, Komishanka waxa u suuro-gashay inuu u

diyaariyo hagaha-habraaca dawladdaha hoose oo loo qaybiyey dawladdaha hoose Ee Borama iyo Gabiley.

3.6.2. Kormeerka Ilaalinta Saacadaha Shaqada Ee Wasaaradaha iyo Hay'addaha Dawladda

Ilaalinta Saacadaha Shaqada Qaranku waxay ka mid tahay xilka iyo Waajibaadka Loo igmaday Komishanka Maamul-wanaaga. Haddaba, isagoo Komishanku ogsoon ahmiyada balaadhan Ee Ilaalinta Saacadaha Shaqada Qaranku u leeyihiin dawladdnimada, wuxuu sannadkan Kormeer ku soo maray Xafiisyada Wasaaradaha Horumarinta Beeraha, Ganacsiga iyo Wershadaha, Waxbarashada, Ciyaaraha, Xanaanada Xoolaha, iyo Cisbitaalka Guud Ee Hargeisa.

Ujeedada Guud Ee Kormeerka ilaalinta saacadaha shaqada ayaa ahayd in la hubiyo sida ay masuuliyiinta dawladda iyo shaqaaluhuba u gudanayaan saacadaha shaqo Ee sharcigu farayo in la shaqeeyo. Gudoomiyaha Komishanka Maamul-wanaaga oo ka hadlay kormeerkan ayaa sheegay in saacadaha shaqo Ee qaranku u baahan yahay in la shaqeeyaa ay hal-bowle u yihiin horumarka Qaranka.

Waxaanu xusay in sannadka 2020 kordhiyey Kormeerada kadiska ah Ee laga fuliyey Hay'addaha dawladda, iyadoo Komishanku uu u soo jeediyey in Masuuliyiinta dawladdu ku sugnaadaan Xafiisyadood si ay bulshadooda ugu adeegaan. Sidoo kale, Komishanku wuxuu wareegto ka soo saaray ilaalinta Saacadaha Shaqada oo loo qaybiyey dhamaan Hay'addaha dawladda, iyadoo lagu wargaliyey in Komishanku kula xisaabtami doono masuuliyiinta dawladda Ee laga waayo xafiisyadood xiliyadda Saacadaha Shaqada Qaranka. Komishanka Maamul-wanaaga, waxa uu diyaar u yahay inuu si dhow u la shaqeeyo dhamaan Hay'addaha dawladda si loo dardargaliyo in shaqada iyo waajibaadka ay u xilsaaran yihiin Masuuliyiinta Wasaaradaha iyo Hay'addaha dawladdu ugu gutaan si waafaqsan mabaadiida Maamul-wanaaga Ee uu horseedka ka yahay KMW.



3.6.3. Kormeerka iyo Qiimaynta Wakaalaha Biyaha iyo Cisbitaalada Gobolada

3.6.3.1. Wakaaladaha Biyaha

Waxaa Komishanka ka go'an in la helo hay'addo dawladeed oo ku suntan daah-furnaan, isla xisaabtan iyo ku dhaqanka sharciga iyo hay'addo tayeysan kana fog wax isbadaba marin iyo musuqmaasuq. Komishanka isagoo ogsoon muhiimada ay hay'addaha adeega bixiyaa qarankan u leeyihiin sida Wakaaladaha Biyaha ayaa waxaa uu kormeer iyo qiimayn uu ku soo maray qaar ka mida Wakaaladaha Biyaha ee dalka, si wax looga ogaado loona darso nidaamkooda shaqo iyo siday ugu adeegaan bulshada dhanka adeeg bixinta iyo waxqabadka.

Ujeedooyinka Kormeerka iyo qiimaynta Wakaalada Biyaha Komishanku ka lahaa waxa ka mid ahaa, In kormeer iyo qiimayn lagu sameeyo Wakaaladaha Biyaha dalka, si loo ogaado xaaladooda maamul, in la darso xirfada hawlwadeenada ka shaqeeya Wakaaladaha Biyaha ee dalka, in komishanka wax ka ogaado hantida iyo agabka ay ugu adeegaan Bulshada, in komishanku qiimeeyo adeegyada ay Wakaaladaha Biyuhu bulshada siiyaan.

Qiimayntan iyo Kormeerkan Komishanka waxa uga soo baxay, in aanay wakaaladaha biyuhu ku wanaagsanayn dhinaca banyaalnimada, siyaasado ay ku shaqeeyeen oo ay ka simanyihiina aanay jirin halka qaar kalena aanay marin qandaraas alaabaha ay iibsanayaan.

Sidaa darteed, dhamaan Wakaaladaha biyuhu waxay u baahan yihiin in loo sameeyo



Capacity Building dhinaca Maamul-wanaaga ah. Waxa kale oo jira caqabado badan oo haysta wakaaladaha biyaha oo ay kamid yihiin, Shidaalka ay isticmaalayaan mishiinadu oo dhiig bax ku ah wakaaladaha, Qalabka dayactirka mashiinada oo ku badan maadaama ay mar walba shaqaynayaan, Tababarada oo ku yar wakaaladaha biyaha, Ceelasha oo duugoobay oo u baahan dayactir, Riigag private ah oo lacag badan qaata oo aanay qaadi karayn Wakaaladuhu.

3.6.3.2. Cisbitaalada

Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu kormeer iyo qiimayn ku soo sameeyey Cisbitaalada gobolada ee kala ah:-Cisbitaalka Degmada Boorama, Degmada Gabiley, Degmada Berbera, Degmada Burco, Degmada Laascaanood, Degmada Ceerigaabo iyo Cisbitaalka Degmada Wajaale. Hawlgalkani wuxuu u dhacay qaab kormeer iyo qiimayn ah oo Komishanku fulieyey, isagoo adeegsanaysa foomamka hagaha qiimaynta iyo baadhista.

Meelaha Komishanku u kuurgalay waxa ka mid ahaa, hanaankooda adeeg bixinta, Dhismeyaasha, iyo Xafiisyadda, Dhokomentiyadda iyo Siyaasadaha ay ku shaqeeyaan, qorshaha iyo istaraajiyada, hanaankooda isla xisaabtan, waxqabadkooda, habkay bulshadu cabashada ugu soo gudbiso, tirada iyo tayada shaqaalaha, hantida cisbitaalka, hanaankooda wax iibsi, maaraynta maaliyada cisbitaalka iyo inay leeyihiin baadhe gudaha ah. Hawlgalkan Komishanka Waxa uga soo baxay qodobadan hoos ku xusan:-

- In dhismayaasha Cisbitaalada dalka badankooda la dhisay xiligii ingiriiska, ayna yihiin dhismayaal filiqsan oo duugoobay.
- Cisbitaalada dalka ma laha siyaasado, hagayaal ay ka midaysan yihiin oo raacaan, marka laga reebo Dukumantiyo ay hay'addo caalami ah u sameeyeen iyo habraacyada shaqaalaha ee hay'adda shaqaaluhu samaysay.
- Cisbitaaladu ma laha qorshe sanadeed qoran ay ugu talo galeen inay sanadkii kaga shaqeeyaan cisbitaalada.
- Cisbitaalada ma laha adeeg caafimaad ee CT-Scan iyo MRI badankooduna ma laha adeega kilyo sifaynta, marka laga reebo Burco iyo Hargeysa.
- Cisbitaaladu ma laha hab ay dadweynuhu igu soo gudbin karaan cabashadooda.



- Shaqaalaha ka hawlgala Cisbilaalada dalka badankoodu ma aha shaqaale dawladeed waa shaqaale ku meel gaadha (Temporary), taas aan lagu dabaqin Karin xeerka shaqaalaha dawladda.
- Cisbitaalada waxay leeyihiin guddi anshax marineed, laakiin ma samaystaan xeer hoosaad maadaama shaqaaluhu Temporary u badan yahay.
- Cisbitaalada dalka waxaa ku yar gaadiidka caafimaadka ama gurmadka degdega ah.
- Shaqaalaha Cisbitaaladu ma helaan tababaro ku filan, marka laga reebo kuway hay'adduhu gunada siiyaan.
- Hanaanka wax iibsi ee Cisbitaaladu dalka waa baal marsan habka wax iibsiga, iyadoo si toos ula macaamila tukaanada oo aan samaynin quotations.
- Shaqaalaha ay hay'adduhu guneeyaan sida loo soo xushay, ma aha mid ah oo loo tartarmaay badankooda.
- Dhakharada TB-da oo ka mid ah Cisbitaalada maamulkooda, marka laga reebo Hargyea iyo Boorama.
- Cisbitaalada oo kab wanaagsan ka hela dawladda dhexe sanadkii u dambeeyey, laakiin hanaankay u maamulaan aanu cadayn.
- Dhakhaatiirta takhususka ah oo badiba ku yar cisbitaalada bariga.
- Hay'addaha caalamiga oo meelo isku mid uun ah kala shaqeeya cisbitaalada sida; hooyada iyo dhalaanka, HIV/AIDS, iyo nafaqo darada.
- Cisbitaaladu ma laha sarkaalka baadhitaanka gudaha (Internal Audit)
- Qaabdhismeedka caafimaad ee gobolada qaar oo iska hor imanaya sida gabiley oo leh isuduwe caafimaad iyo Madaxa Cisbitaalada Gobolka.



- Laydhka iyo biyaha oo kharashkoodu Cisbitaalada ku badan, marka laga reebo gobolada bariga oo biyaha cisbitilaadu yihiin bilaash.
- Xayndaabka dhismaha Cisbitaalka Wajaale oo dad gaar ahi macrad ka dhigteen lagu iibiyo cagafyada.
- Qalabka lagu baadho dadka sakhraasan oo aan oolin Cisbitaalka degmada Wajaale
- Cisbitaalka Wajaale oo aanay lahayn kab uu ka helo wasaarada.
- Dhulka Cisbitaalka Burco oo dad shicib ahi ay dagan yihiin.
- Guddiyada Horumarinta Cisbitaalada oo shaqayn, maka laga reebo Cisbitaalka Hargeysa iyo Berbera.



CUTUBKA AFRAAD: Dib-uhabaynta iyo Maamul-toosinta Hay'addaha Dawladda

4.1. Habraaca-Maamul-toosinta Maamulka Gobolada iyo Dawladdaha Hoose

Hawlaha Maamul-wanaagu waxay sal-dhig u yihiin Koboca dhaqaalaha dalka, Awoodsiinta iyo Socodsiinta hawlaha shaqo Ee ay dawladdu u xilsaaran tahay. Sidaa darteed, isagoo Komishanka Maamul-wanaaga iyo Ladagaalanka Musuqmaasuqu ka duulaya xeerkiisa oo faraya in Komishanku Qiimeyn iyo Darsid ku sameeyo Maamulka Hay'addaha Dawladda kana soo-talobixiyo nidaamyada lagu toosinayo, ayaa wuxuu sanadkan diyaariyey Habraaca-hagaha Maamulka Dawladdaha Hoose Ee dalka.

Ujeeda Habraaca Hagaha Dib-uhabaynta maamulka dawladdaha hoose Ee dalka wuxuu si mug leh ahmiyad u siinayaa tayeynta nidaamkooda maamul si kor loogu qaado adeegyada ay siinayaan bulshada, maadama oo ay dawladdaha hoose qayb muhiim ah ka yihiin horumarinta adeegyada bulshada Ee dalka.

Hagahani wuxuu ku salaysan yahay mabaadiida maamul-wanaaga, sida ku-dhaqanka sharciga, Isla-xisaabtanka, Daahfurnaanta, ka-qaybqaadashada, Darbanaanta, iyo Sugnaan iyo waxqabad lagu saleeyo hawlaha dawladdaha hoose Ee dalka. Sidoo, kale, hagahani wuxuu xooga saarayaa toosinta maamulka shaqaalaha, Gaadiidka, Kaydinta Xogta iyo Nidaamka xog-isweydaarsiga Ee dawladdaha hoose. Wuxuuna si cad u sheegaaya sida ay muhiimka u tahay wada-shaqaynta dawladdaha hoose Ee dawladda dhexe.

Dhinaca kale, Hagahani wuxuu dawladdaha hoose u iftiiminayaa xeerarka looga baahan yahay inay adeegsadaan marka ay hawlahooda shaqo fulinayaan si ay ugu hogaansanaadaan ku-dhaqanka sharciga. Xeerarkaas waxa ka mid ah; Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka, Xeerka Maamulka dhulka, Xeerka Qandaraasyadda Qaranka, Xeerka Amniga Guud iyo Anshaxa, Xeerka Maamul-wanaaga, Xeerka ku-tagrifalka Hantida Qaranka iyo Ladagaalanka Musuqa iyo Xeerka Hanti-dhawraha Guud.

Hagahani waxa kale, oo uu si faahfaahsan u tilmaamayaa sida ay lagama maarmaanka u tahay in masuuliyiinta iyo saraakiisha dawladdaha hoose Ee dalku ku dhaqmaan xilka iyo waajibaadka Ee uu faray Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo

Degmooyinku, lana raacayo qaab-dhismeedka Dawladdaha Hoose Ee dalka. Komishanka Maamul-wanaaga wuxuu hagaha habraaca Maamul-toosinta gaadhsiiyey dhamaan dawladdaha hoose Ee dalka.

4.2. Hagaha-Habraaca Maamul-wanaaga Ee Gudoomiyeyaasha Gobolada

Komishanka Maamul-wanaaga iyo Ladagaalanka Musuqu wuxuu diyaariyey Hagaha-Habraaca Maamul-wanaaga Ee Gudoomiyeyaasha Gobolada dalka. Diyaarinta hagaha badhasaabada goboladu waxay timid, kadib markii uu Komishanku safaro badan oo xog-waraysiya ku maray gobolada dalka, isla-markaan qiimeyn dhab ah ku soo sameeyey Maamulka gobolada iyo Degmooyinka dalka.

Wuxuuna ogaaday in habka ay u shaqeeyaan badhasaabada dalku ay u baahan yihiin in La waafajiyo Mabaadiida Maamul-wanaaga. Komishanku wuxuu soo ururiyey, isla-markaana darsay dhamaan wixii caqabado ku ahaa nidaamka maamulka gobolada iyo Degmooyinka dalka. kadibna waxa uu soo baxday Komishanka Maamul-wanaaga in baahi-weyn loo qabo in maamulka goboladu helaan hage ay raacaan si waafaqsan shuruucda dalka iyo Mabaadiida maamul-wanaaga.

Hagahani wuxuu sida cad u sheegayaa xilka iyo waajibaadka Gudoomiyeyaasha heer-gobol, Kuxigeenadooda, Xogyaha Fulinta iyo Xeerka Nabadgalyada iyo Anshaxa Ee Gudoomiyeyaasha Gobolada. Waxa kale, oo uu xoojinayaa hanaanka wada-shaqayneed Ee Gudoomiyeyaasha Gobolada iyo isuduweyaasha Gobolada Ee Dawladda Dhexe si loo helo hay'ado dawladeed oo isla-jaanqaada, una hogaansanaada shuruucda dalka iyo kala saraynta nidaamka dawlaga ah.

Haddaba hawsha diyaarinta iyo dhamaystirka Hagaha-habaraaca Maamul-wanaagu ay socotay muddo dhawr bilood ah, Komishanku Bishii July, 20keed, 2020 ayuu Laba-kooxood u kala diray Gobolada dalka si ay ugu gubiyaan hagaha-habraaca Maamul-wanaaga Dhamaan badhasaabada dalka, iyadoo hawshaasina si wanaagsan ku soo idlaatay.



Komishanka Maamul-wanaaga iyo Ladagaalanka Musuqu wuxuu hadda wixii ka dambeeya ku qiimeyn doonaa Gudoomiyeyaasha Gobolada sida ay u dabaqaan ama u raacaan hagaha-habraaca Maamul-wanaaga Ee Komishanku u diyaariyey, isla markaana xarumahooda ku gudoonsiiyey.



4.3. Qiimeynta Hanaanka Maamulka Ee Taliska Dab-damiska Qaranka

Komishanka Maamul-wanaagu isagoo ka fulinaya waajibaadkiisa uu siiyey xeerkiisu, wuxuu Kormeer iyo Qiimeyn ku sameeyey Taliska Guud Ee Dabdamiska Qaranka. Komishanku wuxuu uga danlahaan inuu darso hanaanka Maamul Ee Taliska Dab-damiska, qiimeynta waxyaalihii u qabsoomay iyo ka talo-bixinta hanaanka lagu toosinayo maamulkooda.

Meelihii xooga la saaray waxa ka mid ahaa shaqaalaha, qaab-dhismeedka dabdamiska, waxyaabaha u qabsoomay iyo caqabadaha haysta dab-damiska. Sida lagu ogaaday Qiimeynta uu Komishanku ku sameeyey Taliska Guud Ee Ciidanka dabdamiska Qaranka inay qabteen shaqo muhiim u ah Qaranka tan iyo intii la aasaasay, iyagoo hawlgalo badan si degdeg ah uga jawaabay, isla markaana badbaadiyey naf iyo maal badan. Waxa kale oo lagu ogaaday in xafiiska dabdamisku yahay mid si wanaagsan u guta waajibaadkiisa qaran ee saaran, laakiin caqabado badani ku gadaaman yihiin sida ku cad warbixinta Komishanka Maamul-wanaaga.



CUTUBKA SHANAAD: Cabashooyinka iyo Hawlaha Wacyigalinta

5.1. Xoojinta Xafiiska Cabashooyinka

Komishanka Maamul-Wanaaga wuxuu abuuray isla markaana shaaciyay taariikhdu markii ay ahayd 10/10/2020. Xafiiska cabashooyinka waxaana xadhiga ka jaray Wasiirka Wasaarada Diinta iyo Awqaafta Waxa sidoo kale xafladii shaacinta kasoo qayb galay masuuliyiin ka socotay laamaha kala duwan ee dawladda. Dib-Uhabaynta iyo xoojinta qaybta cabashada ee waaxda ladagaalanka musuqa, taasoo uu komishanku uga danlaha in bulshada lagu baraarujiyo in ay jirto goob ka jawaabi karta tabashada ay qabaan bulshadu ee ay ka taban karaan masuul dowladeed.

Waxaa qaybta cabashada lagu soo kordhiyay qof kasta oo ka mida bulshada hadii uu dowlad u sheqeynayo iyo hadii aanu u shaqaynba in ay u furan tahay inuu soo wici karo tilifoonka **9449**, oo ah tilifoonka cabashada bulshada ee komishanka, kaas oo fudaydinaya in qofku si dhibyar uu u soo gudbisankaro waxa uu tabanayo.

Xoojinta qaybta cabashadu waxa ay daawo ka noqon kartaa in masuulku dareemo in ay jirto meel ugu danbaysa haduu kula kaco shaqaalaha ama bulshada uu u adeegayo in ay jirto meel kula xisaabtamaysa dhibta uu geysto. Qaybta cabashadu sidoo kale waxay fudaydinaysaa in la helo xog taasoo la ogaankaro meelaha uu musuqu ka jiro ee u baahan in wax laga qabto. Haddaba Komishanka Maamul-Wanaaga oo qarankan uga xilsaaran toosinta iyo sixida galdaloolooyinka maamul ee dowlada, ayaa wuxuu u gudbiyaa warbixintiisa Madaxwaynaha, taasoo suurto galinaysa in Madaxwaynuhu si dhibyar u kala barto masuuliyiinta loo igmaday in ay u adeegaan bulshada, ka sida daacada ah ugu adeegaya iyo kuwa bulshada khiyaamaya ee aan adeegoodu toosnayn.



5.2. Hawlaha Wacyigalinta

5.2.1. Dooraka Saxaafada iyo Maamul-wanaaga

Komishanka isagoo ka jawaabaya dooraka ay saxaafadu ku leedahay maamul wanaaga, wuxuu u qabtay tababar ku saabsan dooraka saxaafada ee arimaha maamul-wanaaga loona qabtay qaybaha kala duwan ee saxaafada. Tababarkaasi waxa lagu qabtay xarunta Wasaarada Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigelinta.

Kulankaas waxaa ka soo qayb-galay Wasiirka Wasaarada Diinta iyo Awqaafta, Agaasimaha guud ee Wasaarada Warfaafinta, Gudoomiyaha KMW Agaasimaha Guud iyo ururada bahda Saxaafada, ujeedada uu Komishanku ka lahaa qabashada kulankan ayaa daaranayd, In la helo xukuumad iyo saxaafad isula jaanqaada arimaha maamul wanaaga, In la helo saxaafad u hogaansan shuruucda iyo xeerarka dalka iyo in la helo saxaafad garwaaqsan waxa xaq lagu leeyahay iyo xaq ay leedahay, In komishanku wax ka baro anshaxa saxaafada. Gebogebadii kulankaasi waxa ka soo baxay qodobadan hoos ku xusan:-

1. In la xoojiyo ama la badiyo kulamada noocan oo kala ah.
2. In komishanka maamul wanaaga iyo saxaafadu si joogta uga wada shaqeeyaan hirgalinta maamul wanaaga.
3. In komishanku iyo wasaarada warfaafintu ka shaqeeyaan sidii ay isula jaanqaadi lahaayaan dawladda iyo saxaafada madaxa banaani.
4. In komishanka albaabkiisu u furan saxaafada qayabeeda kala duwan.
5. In komishanku ka shaqeeyo sidii kor loo qaadi lahaa xirfada iyo tayada saxaafada Somaliland.
6. In komishanka maamul wanaaga iyo wasaarada warfaafintu wada shaqayn joogto ah yeeshaan.
7. In kulamada ama casharada lagu soo diyaariyo luqaa soomaaliga.



5.2.2. Doorka Culimada Ee Wacyigalinta Maamul-Wanaaga

Komishanka qorshihii 2020, waxa ka mid ahaa inuu qaban-qaabiyo Kulan ku saabsan Doorka Culimada Diintu ka qaadan karaan Wacyigalinta mabaadiida maamul-wanaaga iyo in bulshada laga wacyigaliyo Maamul-xumadda iyadoo loo marayo hanaanka Diinta islaamka. Sida la-wada ogsoon yahay, Musuq-maasuqa iyo Daah-furnaan la'aanta Hay'addaha dowladda waxay si weyn u curyaamiyaan horumarka iyo xasiloona, haddaba, waxa waajib ku ah Komishanka Maamul-wanaagu, isagoo raacaya xeerkiisa inuu wacyigalin balaadhan u sameeyo bulshada iyo dhamaan adeegeyaasha xukuumadda si waxqabadka Xukuumaddu u noqod mid si wanaagsan loogu guulaysto iyadoo loo adeegayo bulshada.

Sidaa darteed, Komishanku wuxuu soo qaban qaabisay kulanka Culimada Ee Doorak Wacyigalinta Maamul-wanaaga iyo Arimaha Ladagaalanka Musuqa, isagoo kaashanaya Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta. Kulankan oo ku qabsoomay Xarunta Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta Ee Jamhuuriyadda Somaliland waxa ka soo qaybgalay 30 ka mid ah Culimada Gobolka Maroodi jeex oo isugu jira Culimada dugsiyada Quraanka, imaamyada iyo mu'adinada Masaajidada. Kulankan waxa furay, Wasiirka Diinta iyo Awqaafta Somaliland, waxaana soo xidhay Gudoomiyaha Komishanka Maamul-wanaaga iyo Ladagalaanka Musuqa. Ujeedooyinka Kulanka waxa ugu muhiimsanaa kuwan hoos ku xusan:-

- ∇ *Inay Culimada Diintu door muhiim ah ka qaataan Wacyigalinta Maamul-wanaaga iyo Ladagalaanka Musuqmaasuqa,*
- ∇ *In Culimadu si dhaw ugala shaqeeyaan Komishanka barnaamijyada lagu wacyigalinayo Bulshada Ee La xidhiidha Maamul-wanaaga iyo Ka hortaga Musuqmaasuqa.*
- ∇ *In Wacyigalinta Culimada Ee Maamul-wanaaga iyo Ladagalaanka Musuqmaasuqa laga samayn karo Masaajidyada iyo xarumaha diinta iyadoo la adeegsanayo Culimada Dalka.*



Gabogabadii Kulanka Wacyigalinta Dooraka Culimada waxa ka soo baxay talooyinkan dhaxal-galka ah Ee hoos ku xusan:-

1. *In la xoojiyo Xidhiidhka Komishanka Maamul-wanaaga iyo Culimada Dalka si ay iskaga kaashadaan arimaha Wacyigalinta Ee Komishanku horseedka ka yahay, iyadoo Culimada xidhiidhkooda loo marayo Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta.*
2. *In la qabto kulamo aad u balaadhan oo ay ka soo qaybgalaan culimda iyo qaybaha kala duwan ee bulshada si la iskula fahmo ahmiyada maamul wanaaga.*
3. *In Komishanku sii waddo kulamada Wacyigalinta Ee noocan oo kale ah, Lana gaadhsiiyo qaybaha bulshada si loo barro Mabaadiida Maamul-wanaaga.*
4. *In Culimada iyo Komishanku iska kaashadaan sidii wacyigalin diiniya loo gaadhsiiin lahaa dhamaan xafiisyada dawladda iyadoo Wasaaraddaha Diinta iyo Awqaafta, Xidhiidhka Goleyaasha iyo Arimaha Dastuurkuna ay goobjoog ka noqodaan hawlaha noocan oo kale; ah ee Komishanku fulinayo.*
5. *In Wasiiradda iyo Agaasimeyaasha Guud Ee Hay'addaha Dawladda Loo qabto kulan noocan oo kale ah, iyadoo lagu wacyigalinayo muxaadaroooyin diiniya oo ku saabsan Dooraka Diinta Islaamku ku leedahay hirgalinta mabaadiida maamul-wanaaga iyo sida Musuqa iyo Laaluushka ay Diinta Islaamku ula dagaalanto, iyadoo uu Komishanku martiqaad u fidinayo Madaxweynaha Qaranka Furitaanka kulamada noocan oo kale ah si loo muujiyo rabitaanka siyaasadeed Ee Maamul-wanaaga iyo Ladagaalanka Musuqa.*
6. *In Manhajka waxbarashada dalka lagu darro barashada Maamul-wanaaga iyo dhibaataada uu musuqu u leeyahay bulshada.*
7. *In Guud ahaan masuuliyiinta iyo shaqaalaha dalka Ee u adeegaya bulshada aqoontooda diineed kor loo qaado iyadoo kulamo-wacyigalined oo dhinacyo badan leh la siinayo.*
8. *In Komishanku Xoojiyo Xafiisyada Wacyigalinta iyo Cabashooyinka si bulshadu u hesho hay'ad dawladeed oo laga heli karo wacyigalin isla markaana looga caban karo ku-tagrifalka awoodeed Ee Hay'addaha dawladdu kula kacaan shaqaalaha iyo Bulshada ay u adeegayaanba.*

9. *Culimadu waxay soo jeediyeen in Madaxweynaha JSL, uu xoojiyo awooda fulineed Ee Komishanka Maamul-wanaaga si uu iskuugu xidhi karo dhamaan nidaamyada maamul ee dalka si khilaaf looga badbaado (Conflict of Mandates).*



5.2.3. Kulanka Wacyigalinta Ee Isuduweyaasha G. Maroodi Jeex

Komishanka Maamul-wanaaga wuxuu kulan tababar iyo wacyigalinta Habraaca-Maamul-wanaaga Ee Isuduweyaasha Gobolka Maroodi Jeex, ku qabtay Xarunta Gudoomiyaha Gobolka Maroodi Jeex, Bishii March, 5, 2020. Waxaana ka soo qaybgalay Madaxa Komishanka oo ay weheliyaan, Gudoomiyaha Gobolka iyo dhamaan isuduweyaasha Gobolka Ee Wasaaradaha iyo Hay'addaha Dawladda.

Waxa kulankan ka soo baxay xoojinta wada-shaqaynta Xafiiska Gobolka iyo Komishanka Maamul-wanaagga si loo qiimeeyo waxqabadka isuduweyaasha gobolka Maroodi Jeex. Kulankan sadex-geesoodka ah waxa si wadajir ah u soo qaban-qaabiyey Komishanka maamul-wanaaga iyo Xafiiska Gudoomiyaha Gobolka Maroodi Jeex.

Ujeedooyinka Kulanka waxa ka mid ahaa in Isuduwayaasha iyo xafiiska maamulka gobolku isku-xidhnaadaan. In isuduwuhu ilaaliyaan ku dhaqanka sharciga, isla markaana ay raacaan habraaca maamul-wanaagga ee faraya hirgalinta maamul-wanaaga. Iyo in Xafiiska Gobolka iyo Komishanka Maamul-wanaagu ka wada-

shaqeeyaan helitaanka waxyaalaha ka maqan isuduweyaasha si ay shaqadooda u gutaan.

Falanqayn dheer ka dib, Komishanka Maamul-wanaaga, Xafiiska Maamulka Gobolka iyo Isuduweyaashii Kulanka ka qaybgalay, waxay isla qaateen qodoban hoos ku xusan:-

- ∇ *In la xoojiyo hirgalinta mabaadiida maamul-wanaagga isla markaana ay labada xafiis wada-shaqayntooda kor ay u qaadaan iyadoo laga duulayo Qorshaha Komishanka Maamul-wanaaga Ee 2020.*
- ∇ *Xoojinta iyo Joogtaynta nidaamka wada-shaqaynta, dardargalinta Hawlaha shaqo iyo in lala-xisaabtamo sida iskuduweyaasha Gobolka Maroodi Jeex ay waajibaadkooda shaqo u gudanayaan iyagoo si dhow ula shaqaynaya maamulka Gobolka Maroodi Jeex.*
- ∇ *Hirgalinta Habraaca maamul-wanaagga Ee isuduweyaasha Gobolka Maroodi jeex*
- ∇ *Ku Wacyigalinta nidaamka maamul-wanaaga isuduweyaasha iyo Xafiiska badhasaabka Gobolka Maroodi Jeex.*



5.2.4. Gaadhsiinta Fariimaha Wacyigalinta Ee Bulshada

Siyaasada Komishanka Maamul-wanaagga ee ku aadan kobcinta iyo ku wacyigalinta Mabaa'diida maamul-wanaagga ee Hay'addaha xukuumadda Somaliland; waxa ka

mid ah, Diyaarinta barnaamijyo kala duwan oo ka hadlaya wacyigalinta Maamul-wanaaga iyo ka hortaga musuqa oo ah labada tiir Ee Komishankani qaranka ugu xilsaaran yahay.

Sidaa darteed, Komishanku sanadka waxa uu diyaariyey hawgalo- wacyigalined oo iskugu jira diyaarinta heesta Komishanka, Riwaayad ka hadlaysa Ilaalinta Saacadaha Shaqada Qaranka oo laga sii deyn doono Warbaahinta qaranka iyo kuwa gaar loo leeyahay. Waxa kale, oo uu Komishanku diyaariyey fariimo wacyigalined oo iyaga oo agab ahaan loogu qaybiyey xafiisyada dawladda iyo kuwa gobolada dalka. Fariimahan kuwooda ugu muhiimsan, waxa ka mid ah;

1. Qaad-qaad qofkii lagu yaqaan, qalinka ha u dhiibin.
2. Musuq cune, muuqan doonee.
3. Maamul-xumo, waa masiibo qaran.
4. Xaq waxaad u leedahay, ha ku bixinin laaluush.
5. Xaq waxaad u leedahay ha ka doonin Laaluush.

Waxa, kale oo uu Komishanku joogteeyaa sanad walba, Barnaamijka gaar ah oo loo bixiyey *“Barnaamijka Maamul-wanaaga iyo Wacyigalinta Bulshada”*. Barnaamijkan waxa loogu talo-galay hirgalinta Maamul wanaagga si loo horumariyo isku xirnaanta iyo wada shaqaynta dowladda iyo shacabka. Barnaamijkan ayaa si gaar ah diiradda u saaraya in laga wad shaqeeyo sidii loo soo saari lahaa Bulsho dhisan oo ka caafimaad qabta wax walba oo dib u dhac ah, isla markaana xoojisa Maamul-wanaagga.

Barnaamijkan Maamul-wanaagga iyo Wacyigalinta Bulshada ah ayaa noqonaya todobaadle, loo asteeyey inuu ka baxo idaacadda Radio-Hargeisa todobaadkiiba hal mar, isla markaana ujeedadiisu tahay kor u qaadista wacyigalinta Bulshada Ee dhanka Maamul-wanaagga, Waddaniyadda, ku baraarugsanaanta ka qayb qaadashada horumarka dalka iyo ka hortagga wax kasta oo Bulshada wax u dhimaya sida Musuqmaasuqa, Maamul-xumada iyo wixii la mid ah.

Barnaamijka oo lagu waraystay Gudoomiyaha Komishanka ayaa waxa uu iftiimyey muhiimada tiirarka maamul-wanaagu u leeyihiin in shaqooyinka Hay’addaha dawladda lagu maamulo.

Waxaanu sidoo kale, aad ugu faahfaahiyey dhinaca waddaniyada isagoo xusay in Komishanku uu xoojinayo barnaamijyada wacyigalinta wadaniyada oo uu Komishanku doonayo in aad uga shaqeeyo sanadada dambe si loo gaadho maamul-wanaaga dhamaystiran oo ka hirgala gayiga Somaliland. Waxa kale, oo uu xusay in sanadka dambe ay qorshaha ugu jirto in Jaamacadaha iyo Iskuulada lagu wacyigaliyo maamul-wanaaga iyo fahamka wadaniyadda.

Intii barnaajikani socday, Gudoomiyaha Komishanka maamul-wanaaga iyo Ladagaalanka Musuqu, waxa uu hoosta ka xariiqay inay muhiim tahay dhiirigalinta wada-shaqaynta Hay'addaha dawladda, iyadoo la raacayo fulinta sharciga, isagoo xusay in Komishanku marka uu xalinayo khilaafka ka dhex-dhaca Hay'addaha dawladda uu raaco Xeerka Kala Xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'addaha Madaxa Bannaan Xeer Lr. 71/2015 iyo xeer nidaamiyihii uu soo saaray Madaxweynaha Somaliland oo si faahfaahsan u sheegaya Dhismaha Wasaaradaha iyo Hay'addaha Xukuumadda (Xeer-nidaamiye Lr.01/2018).

Gabo-gabadii Gudoomiyaha Komishanka Maamul-wanaaga iyo Ladagaalanka Musuqmaasuqu, Mudane, Dayib Aadan Xaaji Cali uu dardaaran u soo jeediyey bulshada Somaliland oo uu ka codsaday in aanay ku khasbin madaxda u adeegaysaa inay sameeyaan musuq, qaraabo-kiil iyo maamul-xumo. Waxaanu u soo jeediyey bulshada Somaliland inay Komishanka Maamul-wanaaga kala shaqeeyaan sidii loo gaadhi lahaa maamul-wanaaga uu qaranka Somaliland hiigsanayo.

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



KOMISHANKA MAAMUL-WANAAGA
IYO LA DAGAALANKA MUSUQMAASUQA
(KMW&LM)



**“MUSUQ CUNE
MUUQAN DOONEE”**

**“YOU CAN'T HIDE
CORRUPTION”**

DHEEMAN

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



KOMISHANKA MAAMUL-WANAAGA
IYO LA DAGAALANKA MUSUQMAASUQA
(KMW&LM)



**“XAQ WAX LAGUUGU LEEYAHAY
HAKA DOONIN LAALUUSH”**

**“Don't seek a bribe on what
you are obliged to do”**

DHEEMAN

5.2.5. Riwaayadda Ilaalinta Saacadaha Shaqada

Maadama oo la joogo wakhtigii uu Maamul-wanaagu ku baahi lahaa Somaliland oo dhan, Musuqmaasuqana si wada jir ah loola dagaalami lahaa, Komishanku wuxuu ahmiyad weyn siiyey sanadkan diyaariyey ruwaayad Kooban oo ku saabsan Ilaalinta Saacadaha shaqada Qaranka oo masuuliyiinta iyo Shaqaalaha dawladda ku baraarujinaysa inay dhawraan wakhtiga shaqada Ee Muwaadiiniintu u baahan yihiin in loo adeego loogana fogaado wax kasta oo waxyeelaynaya xilliyada shaqada.

Riwaayadan Wacyigalinta ahi waxay diirada saartay marmarsiiyada ay had iyo jeer shaqaaluhu u sheegtaan madaxdooda si ay shaqada uga sagsaagaan. Ujeedada Riwaayadan ayaa tilmaamaysa in Komishanku isagoo adeegsanaya xeerkiisa uu dabagal ku sameeyo hanaanka shaqada iyo shaqaalaha si loo daryeelo saacadaha shaqada Qaranka.

Hawlaha Wacyigalinta ah Ee noocan oo kale, waxa uu Komishanku uga danleeyahay in shaqaalaha iyo Madaxduba ay isla jaanqaadaan oo dhawraa saacadaha shaqada iyadoo uu Komishanku qaarka mid ah Hay'addaha dawladda uu Kormeero dabagalka ilaalinta saacadaha shaqada ku sameeyey. Sidaa darteed, riwaayadan Wacyigalinta waxa laga baahin doonaan warbaahinta Qaranka si loo muujiyo in shaqada qaranku aanay dayacmin. Komishanku wuxuu sii waddi doonaan diyaarinta ruwaayado, fariimo iyo wacyigalin diiniya oo dhamaantood daaran ilaalinta saacadaha shaqada Ee Qaranka. Budhiga Riwaayadan ayaa ahaa “ Maamul-xumo waa masiibo-qaran”

5.2.6. Xoojinta Barta Komishanka iyo Mareegta

Komishanku waxa uu dadaal iyo xoogba galiyey inuu xoojiyo barta facebuuga Ee Komishanku ku leeyahay warbaahinta bulshadu kuwada xidhiidho (Social Media). Waxa kale; oo uu sanadkan abuuray mareegta Komishanka. Muddooyinkiin u dambeeyey Komishanku waxa uu warbixino tifaftiran oo ku salaysan xogta waxqabadkiisa ku daabacay bartiisa facebook. Xoojinta Barta Facebuuga Komishanku waxay keentay in warkiisa, iyo warbixinadiisuba gaadhaan Bulsho ku dhaw 10 Kun oo qof oo si joogto ah ugu xidha barta KMW, isla markaana uu Komishanku u adeegsado hawlihiisa wacyigalined Ee bulshada gaadhsiiinayo.

Waxa xusid mudan in dhamaan hawlaha u qabsoomay Komishanka Sanadkan 2020, iyagoo warar videos ah, qoraaladoodii iyo dhamaan sawiradii la xidhiidhay laga helayo barta Komishanka oo ah (Komishanka Maamul-wanaaga). Arintan oo xoojisay in Komishanku kaydiyo xogtiisa oo tixraac laga heli karo marka loo baahdo.

CUTUBKA LIXAAD: Horumarka Qaybta Maamul-wanaaga Ee Qorshaha Qaranka NDP 2 iyo Tayeynta Shaqaalaha KMW

6.1. Qaybta Maamul-wanaaga Ee Qorshaha Horumarinta Qaranka

Qaybtani waa qayb gaara oo khusaysa Barnaamijka Hiigsiga Qaranka ee 2030 (National Development Plan II, Governance Sector) ee qeybta Komishanka Maamul-wanaagu ka yahay Xoghaynta. Barnaamijkan Komishanka Maamul-wanaaga waxa Masuul uga ah Waaxda Qorshaynta ee Komishanka. Barnaamijka hiigsiga Maamul-wanaagu wuxuu ka kooban yahay Shan qayb-hoosaad oo kala ah:

- ▽ Qeybta khayraadka (public resource),
- ▽ Qeybta Maamul-daadejinta iyo Dimuquraadiyada,
- ▽ Qeybta Amniga
- ▽ Wadaagaha Cadaalada iyo ku dhaqanka sharciga.
- ▽ Iyo Qaybta Arimaha Dibada

Haddaba, Komishanka Maamul-wanaaga, waxa uga qabsoomay Hiigsiga Qaranka ee 2030 (Governance Sector) ee Qorshaha hormarinta Amuruurahan hoos ku xusan.

1. Diyaarinta Kulamada kala duwan ee qeyb hoosaadyada
2. Iyo isku xidhka iyo dabagalka kulamada kala duwan ee qayb hoosadyada.



6.2. Waajibaadka Qaybta (Sector) KMW

Xilka iyo Waajibaadka Qeybta Maamul-wanaaga waxaa kamida Kuwan hoos ku xusan.

1. Diyaarinta Agendaha kulamada kala duwan ee qayb hoosaadka Maamul-wanaaga ee Qorshaha Hormarinta Qaranka.
2. Qaybitna iyo dirida Agendaha iyo Waraaqda martiqaadka ee kasoo qaybgaleyaasha
3. Diyaarinta Minuteska Kulanka Guud ee Qeybta Maamul-wanaaga
4. Iyo dabagalka go'aamada iyo qaraarada la isla qaato.
5. Xidhiidhinta dhamaan hayadaha dawladda ee ku jira Qeybta Maamul-wanaaga
6. Qaban-qaabada kulamada loogu diyaar garoobayo kulanka weyn ee Qeybta maamul-wanaaga.
7. Iyo la talinta dhamaan hayadaha dawladda ee ku jira Qeybta maamul-wanaaga ee qorshaha hormarinta ee labaad.

6.3. Qayb-hoosaadyada Maamul-wanaaga

Kadib markii ay bateen Hay'addaha dawladda ee ku bahoobey Qeybta Maamul-wanaaga waxa loo qaybiyey shantan qayb hoosaad tiiyoo la isku raaciyey siday shaqadoodu isagu dhawdahay. Shaqadan oo masuuliyadeeda iyo maareynteeda uu lahaa Komishanka Maamulwanaagu. Waxaanay kala yihiin sidan hoos ku xusan.

1.	Qaybta Khayraadka Dalka (Public Resources)
1.	Xisaabiyaha Guud Ee Qaranka (Accountant General)
2.	Wasaaradda Horumarinta Maaliyadda (Ministry of Finance)
3.	Wasaaradda Qorshaynta iyo Horumarinta Qaranka (Ministry of National Planning and Development)
4.	Hanti-dhawraha Guud Ee Qaranka (Auditor General)
5.	Mac-hadka Shaqaalaha Dawladda (Civil Service Commission)
6.	Komishanka Maamul-wanaaga (Good Governance Commission)
7.	Guddida Qandaraasyadda Qaranka (National Tender Board)
8.	Hay'ada Dhawrista Tayada (Quality Control Commission)
2.	Qaybta Maamul-daadejinta iyo Dimuqraadiyadda
1.	Ururka Dawladdaha Hoose (Association of Local Government Authorities)
2.	Wasaaradda Warfaafinta Dhaqanka iyo Wacyigalinta (Ministry of Information, Culture and National Guidance)
3.	Wasaaradda Arimaha Gudaha (Ministry of Interior)
4.	Guddida Doorashooyinka Qaranka (National Electoral Commission)
5.	Xisbiyadda Qaranka (Parties)
3.	Qaybta Cadaalada iyo Ku-dhaqanka Sharciga
1.	Hay'ada Qaxootiga iyo Barakaceyasha Qaranka (National Displacement and refugee Agency)
2.	Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud Qaranka (Office of the Attorney General)
3.	Wargayska Dawan Ee Dawladda (Government Gazette)
4.	Wasaaradda Xidhiidhka Goleyaasha iyo Arimaha Dastuurka (Ministry of Parliamentary relations and Constitutional Affairs)
5.	Wasaaradda Diinta iyo Awqaafta (Ministry of Religion and Endowment)
6.	Wasaaradda Cadaalada (Ministry of Justice)
7.	Guddida Xuquuqal Insaanka Qaranka (National Human Rights Commission)
8.	Maxkamada Sare (Supreme Court)
4.	Qaynta Arimaha Dibada
1.	Wasaaradda Arimaha Dibada iyo Xidhiidhka Caalamiga ah (Ministry of foreign Affairs and International Cooperation)
2.	Hay'adda Qurba-jooga Somaliland (SL Diaspora Agency)
3.	Wasaaradda Horumarinta Maal-gashiga (Ministry of Investment Promotion)
4.	Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigalinta (Ministry of Information and National Guidance)
5.	Wasaaradda Arimaha Gudaha (Ministry of Interior)
6.	Wasaaradda Gaashaandhiga (Ministry of Defense)
7.	Hay'adda Madaaradda Somaliland (Somaliland Civil Aviation Authority)
8.	Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta Jidadka (Ministry of Transport and Roads Development)
5.	Qaybta Amniga
1.	Wasaaradda Gaashaandhiga (Ministry of Defense)
2.	Wasaaradda Arimaha Gudaha (Ministry of Interior)
3.	Ciidanka Ilaalada Xeebaha (Somaliland Coastal Guards)
4.	Ciidanka Dab-demiska Qaranka (Somaliland Fire Brigade)
5.	Ciidanka Socdaalka (Somaliland Immigration Police Force)

6.4. Kulamada Qeybta Maamul-wanaaga (Governance Sector)

Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu diyaariyaa kulamada kala duwan ee Qaybta maamul-wanaaga oo u qaybsan sidan hoos ku xusan.

1. In Komishanku qaban Qaabiyo kulamada gaarka u ah qayb hoosaadyada Maamul-wanaaga.
2. Qaban-qaabada kulanka Guud ee Maamul-wanaaga ee qorshaha Labaad ee qaranka.
3. Iyo dabagalka wixii ka soo baxay kulamadaasi.

6.5. Shaxda Kulamadii Qabsoomay

Qeybta Maamul-wanaaga waxaa u qabsoomay kulamadan hoos ku xusan:-

S/N	Kulanka Magaciisa
1	Kulanka Qeybta khayraadka dalka (public resources)
2	Qeybta Cadaalada iyo ku dhaqanka sharciga (justice and rule of law)
3	Qeybta Amniga (Security)
4	Qeybta Maamul-Daadejinta iyo Dimuquraadiyada (Decentralization & Demcoracy)
5	Kulanka Guud ee Qeybta Maamul-wanaaga oo qabsoomi doona October 28 th , 2020.

Markay soo dhamaadaan dhamaan Kulamada qayb hoosaadyada kala duwan oo sadexdii biloodba halmar la qabto, waxa laqabtaa kulanka Guud ee qeybta Maamul-wanaaga oo ay isku yimaadaan qeyb hoosaadyada kala duwani oo laga wada xaajoodo wixii qabsoomay waxa dhiman iyo qorshaha sadexda bilood ee soo socda.

6.6. Habraaca Abaabulida Hawlaha Qeybta Maamul-wanaaga (Governance Sector)

Diyaarinta iyo abaabulida kulamada Qeybta Maamul-wanaagu waa mid sadex bilood le ah, waxaanay qayb hoosaad kastaa sadexdii biloodba Komishanku u diyaariyaa kulan taasi oo ka dhigan in qayb kastaa sannadkii yeelato afar kulan. Halka markay kulamadaasi dhamaadaan hadana komishanku diyaariyo kulanka guud ee Qeybta maamul-wanaaga oo sidaan hore u sii sheegay lagaga hadlo wixii qabsoomaya waxa dhiman iyo qorshaha sadexda bilood ee dambe.

Ugu dambayntiina, warbixinta kulanka guud ee qeybta Maamul-wanaaga waxa diyaariya Komishanka Maamul-wanaaga, wuxuuna lawadaagaa hay'addaha ay khusayso.

6.7. Horumarinta iyo Tayeynta Shaqaalaha KMW

Komishanka Maamul-wanaaga waxa uu sannadkan ahmiyada siiyey xoojinta, tayeynta Shaqaalaha Komishanka, maadama oo ay yihiin kuwa budhiga u ah socodsiinta hawlaha Komishanka. Si loo dhiirigaliyo shaqaalaha, Komishanku wuxuu sannadkan shaqaalaha si joogto ah u siinayey tababaro la xiriira shaqada ay qabanayaan iyo shaqo-tusid, iyadoo loo diyaariyey xil-qeexida shaqooyinkooda si u fududaato shaqada ay qabanayaan.

Komishanku wuxuu shaqaalaha qaar ka mid ah ka taageeraa kharashka waxbarashada sare Ee Jaamacadaha dalka, halka qaarkoodna qalin jabiyeen 2020, iyadoo bartay maadooyin la xidhiidha maamul-wanaaga iyo hanaanka dawladda. Waxa xusid mudan inay sannadkan 4 ka mid ah shaqaalaha Komishanku ka qalin-jabiyeen waxbarashada sare halka 3 kalena wadaan sannadkan.

Dhinaca kale, Komishanku wuxuu sannadkan 7 kamid ah shaqaalaha u diray Machadka Horumarinta Shaqaalaha Dawladda (CSI) iyadoo la siiyey korsooyin gaagaaban oo la xidhiidha shaqadood si aqoontooda Kor loogu qaado. Tayeynta aqoonta shaqaalaha ayuu Komishanku uga gol-leeyahay in lagu horumariyo xirfadooda shaqo si ay uga go'naato inay si hufan ugu gutaan waajibaadkooda shaqo.

Ugu dambeyn, Komishanku wuxuu dib-uhabayn ku sameeyey Guddida Anshax marinta Shaqaalaha oo ka kooban sadex loona raacay nidaamka habraaca shaqaalaha dawladda. Haddiba shaqaale la anshax marinayo, waxa loo raaca in nadaamka habraaca shaqaalaha dawladda Ee Hay'adda Shaqaalaha Dawladda.

6.8. Gunaanadka Warbixinta

Waxqabadka Komishanka Maamul-wanaaga Ee 2020, waxyaalihii uga qabsoomay qorshe-sannadka 2020, waxay si kooban u iftiimaynaysaa barnaamijyadda Maamul-wanaaga, Ladagaalanka Musuqa, Wacyigalinta Bulshada, Doorka Komishanka Ee Dib-uhabeynta Hay'addaha dawladda, Falanqaynta Miisaaniyadda 2020 iyo daraasaha, hageyaasha iyo siyaasadaha Maamul-wanaaga iyo Xil-wareejinta.

Waxa kale, oo ay warbixintani shaacisay in dhamaan hawlgalada uu Komishanku sameeyey muddadii uu sannadka ahayd ay yihiin kuwo si wanaagsan u midho-dhalay, inkasta oo uu jiray Cudurka Covid 19 oo saamayn baaxad leh ku yeeshay waxqabadka Komishanka Maamul-wanaaga.

Ugu dambayntiina, Komishanka Maamul-wanaagu wuxuu rajaynayaa in siyaasaddaha iyo habraacyadda uu diyaariyey hirgalintooda si fiican loo fulin doono sannada dambe, maadama oo hirgalintoodu ay sal-dhig u yihiin in Maamul-wanaagu ka hirgalo dhamaan laamaha dawladda Ee gobolada iyo Degmooyinka dalka.

Sawiro Guud



Qaar ka mid ah Hawl-wadeenada Komishanka Ee ka qayb-qaatay soo ururinta Xogta Cilmibaadhista Maamul-wanaaga



Fariimaha Wacyigalinta Ee La lawadaagay Isuduweyaasha Gobolka Maroodi Jeex



Kulanka Lagu daafuray Xafiiska Cabashooyinka



Kulanka dhamaystirka Hagaha Baadhista iyo Qiimaynta Ee Komishanka



Kulanka Shaacinta Daraasada Maamul-wanaaga Ee Hay'addaha Dawladda



JAMHUURIYADDA SOMALILAND



KOMISHANKA MAAMUL-WANAAGA
IYO LA DAGAALANKA MUSUQMAASUQA
(KMW&LM)



**“XAQ WAXAAD U LEEDAHAY
HAKU BIXININ LAALUUSH”**

**“Don't give a bribe on
your rightful services”**

TOHELMAN



Komishanka Maamul-Wanaaga JSL

www.ggc.govsomaliland.org

2020



Komishanka Maamul-Wanaaga JSL



www.ggc.govsomaliland.org